JAMHUURIYADDA DIMUQORAADIGA SOOMAALIDA
WASAARADDA WAXBARASHADDA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJTA

# SUUGAANTA

## FASALKA SHANAAD

## 5



# SUUGAANTA

## FASALKA SHANAAD

## 5

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJTA

# HORDHAC

Buuggan oo ah buuggii labaad ee Suugaanta, waxa loogu tao galay ardayda ku jirta fasalka Shanaad. Buuggu waxa uu la socdaa kii ka horreeyey; waxanu u dhigan yahay habkiisii oo ah dul-xaadin waaxaha suugaanteena gaar ahaan inteeda u cuntamaysa caruurta da'dan ah. Taa iyaga oo maskaxda ku hayana waxay qorayaashu iskudayeen in ay ka dhigaan midhahoodan kuwo ku talaali kara ilmaha Soomaaliyeed jeclaysiga iyo u-hilowga dhaqankiisa hodanka ah.

Xafiiska Manahijtu wuxuu mahad u celinayaa Jaallayaashii qayb ka qaatay. Cabdillahi Maydhane Warsame iyo Cabdillahi Cali Axmed oo lahaa qoraalka gabayada. Ibraahim Cali Riyaal, Cumar Maxamed Saalim iyo Cali Buraale Raage oo lahaa curinta, ururinta iyo qoraalka sheekooyinka iyo curisyada. Maxamuud Maxamed Faarax oo isku dubbariday heesaha. Kinsi Caydiid Raage iyo Shamsa Yusuf Ismaaciil, oo lahaa ururinta iyo qoraalka Buraanburada. Maxamed Cabdi Jaamac, Axmd Cali Cilmi, Cabdillahi Xaaji Cali iyo Cismaan Sheekh Maxamed, oo soo ururiyey maansooyinka qoran in ka mid ah. Daa'uud Daahir, Xasan Sheekh Muumin, Cumar Aw Nuux iyo Ismaciil Ducaale, tilmaamihii iyo talooyinkii aan ka hellay.

Mahad gaar ah waxa iyana leh Wakaaladda Madbacadda Qaranka oo aad isugu xilqaantay soo saaridda buuggan.

**Bashiir Faarax Kaahiye**
Maamulaha Xafiiska Manaahijta

# TUSMADA


| | |
|---|---|
| Aloolka | 1 |
| Wadaado iyo Wiilwaal | 3 |
| Dhaqanka isbeddelka ku dhacay | 6 |
| Nimaad dhashay kuma dhalin | 8 |
| Kala sinnaan dad | 11 |
| Webi | 14 |
| Afrikaay huruddooy | 17 |
| Ololaha Horumarinta Reer Miyiga | 19 |
| Laanta Caafimaadka (WHO) | 23 |
| Ogow | 24 |
| Rah qaamaysan | 26 |
| Hays-xakabin meel | 28 |
| Tawraddii Oktoobar | 31 |
| Guubaabo | 33 |
| Waari-mayside war ha kaa hadho | 34 |
| Aamin | 36 |
| Shaah aan shaahba ahayn | 38 |
| Kacaan ah | 40 |
| Waxtarka dhirta | 41 |
| Dhirta | 43 |
| Ina–xagaadheere | 46 |
| Geed iyo ruux | 47 |
| Dardaaran | 49 |
| Wiil-waal | 51 |
| Hooyo | 55 |
| Arraweelo | 57 |

Midab gumeysi diida . . . . . . . . . . . . . . 59
Geela . . . . . . . . . . . . . . . . . 61
Dheg-dheer . . . . . . . . . . . . . . 63
Guulwade . . . . . . . . . . . . . . . 65
Caafimaad . . . . . . . . . . . . . . . 67
Afka hooyo . . . . . . . . . . . . . . . 69
Dhallinyaro . . . . . . . . . . . . . . 71
Ishtiraakiyada . . . . . . . . . . . . . . 74

Buggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo aan
Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin
ogolaansho

Waxaa lagu daabacay
Madbacadda Qaranka
Xamar, 1976

## Casharka I

## ALOOLKA (Hees)

Aloolka waxaa laga sameeyaa geedka duurka la yidhaahdo oo laamo dhuudhuuban leh. Suufaf calal ah iyo xadhko ayaa la isugu soohaa. Si farshaxan ah oo qaabsan yey u sameeyaan. Inta ay sameynayaan haweenku waxay isku madadaaliyaan heeso jiib ah oo ay hawsha ku ilaawaan. Heestan oo ka mi ah heesaha aloolka waxaannu ka soo guurinnay buugga hiddaha iyo dhaqanka ee uu qoray Cumar Aw Nuux.

**Aalla waa xujooy waa xujooy !**
**Geel xerada diidaa waa xujooy !**
**Alla waa xujooy waa xujooy !**
**Xero kale ka ololaa waa xujooy !**

* * *

**Alla waa xujooy waa xujooy !**
**Faras xerada diidaa waa xujooy !**
**Alla waa xujooy waa xujooy !**
**Xero kale ka dananaa waa xujooy !**

* * *

**Alla waa xujooy waa xujooy !**
**Gabadh xilaha diidaa waa xujooy !**
**Alla waa xujooy waa xujooy !**
**Xeelad bay ka wadataa waa xujooy !**

Waxaan iyana ku daraynaa heesta cawska. Waxa laga sameeyaa cawska, xadhko dun midabbo leh oo lagu tolo cawka engegay. Hees hawleedan waxaa lagu dareeriyaa cawskaa oo guryaha miyiga lagu dhiso, gogol lagu seexdana laga digto.

## CAWSKA

**Cawdu billooy beloy baydheey, hoyal !**
**Belo daran ka yaasiinay, hoyal !**
**In shar le'ba sharkeed li'inay hoyal !**
**Ay hooyaalaayow, hoyaalaay !**

**Cawskanow sabool diidow, hoyal !**
**Waqan suuqa lagu dhiginay, hoyal !**
**Soddon lagugu baayicinay, hoyal !**
**Yaa sameeyey lagu odhanay, hoyal !**
**Ay hooyaalaayow hoyal !**
**Ay hooyaalaayow hoyee, hoyaalaay !**

Casharka II

## WADAADO IYO WIILWAAL

Wiilwaal oo maalin meel maraya ayaa la kulmay wadaad caalin ah diintana ku xeel dheer dadkuna ku wada yaqaan oo la odhan jiray Aw Samatar Leedo. Wiilwaal baa ku yiri: «Waar horta dadka wadaadow maxaad ku waanisaan ?» Aw Samatar baa intuu garaadkii kor u eegay dhoosha ka qoslay: «Garaad cabsida Ilaahay baannu dadka ku waaninaa». Wiilwaal baa cabbaar aamusay, faraskii ka soo degay oo wadaadkii fool fool isu hor taagey, oo isagoo ilkacadaynaya weyddiiyey wadaadkii : «Oo Ilaahay mooye cid kale oo laga cabsadaa miyaanay jirin ?». Wadaadkii baa naxay oo u qaadan waayey, gadaal buu u booday sidii uu dab ku joogsaday. Madaxuu xaggan iyo xaggan u ruxay oo dhafoorka qabsaday, oo hoos u yidhi : «Inna lillaahi waa inna ileyhi raajicuun. Garaad cabsida ilaahay cidna laguma labayn karo. Ilaah mooyee cid kale in laga baqaa maba bannaana».

Wiilwaal baa iska dhaqaaqay oo faraskii dusha uga baxay oo wadaadkii ku yidhi: «Dood baan ka qabaaye, bal wadaadadiina oo dhami isu qaylo dirta oo waa innoo berrito iyo geedkii halkaas ahaa». Halkii baa lagu dhaqaaqay, wadaadkii baa qaylo kula dhex dhacay culimadii degmada, wiilwaal iyo arrinkiisii uga warramay, halkii baa laysu wada cid dirtay, kutubtii baa la soo qaatay, xujooyinkii baa laysla soo aloosay, oo tubta la soo qaaday iyadoo ballankii lagu soconaayo.

Wiilwaal meel ood badan oo Dhiba la yiraahdo oo Jigjiga u dhow ayuu geed hadhaca hoosiisa ood dheer ku soo xeeray, wuxuu ka sameeyey ardaa ilaxidh leh, irrid kaliyana uu u banneeyey daaftana dareemo iyo caws si debecsan loogu gogley, dacalladana deyrku joog nin le'eg yahay; aqal-soomaali weynna oodda dhabarkeeda ka dhisay. Adhi wanan soocan ahna meeshii buu keenay. Col fardooley ahna gees kastaba laba nin ka joojiyey.

Wadaadadii oo halkii loo gogley dhaalacyeynaya, kutubtiina geedka u sudhan tahay, su'aashii ay filayeen ee meesha u yimaadeenna u darban, ayaa Wiilwaal oo ay hareero socdaan laba nin oo xoog weyni, dharkii dagaalkana huwan, laba se-

efoodna kala sitaa, wadaadadii irridda iska soo taagey. Intuu faadhumaystay oo lugba meel dhigay giirna iska kiciyey kelyaha qabsaday, wadaaddadiina il xun ku eegay, yuu labadiisii nin ku yidhi: «qaybta»; isagoo gafuurka cirka u taagaya.

Labadii nin ee xoogga weynaa, ayaa labadii wadaad ee ugu soo xigey soo qabtay oo kaxeeyey. Aqalkii bawdka ku dhegganaa bay la galeen. Kolkaasaa qub iyo qac iyo caadu yeedhay. Wadaadadii oo yaabsan, oo dhegta taagaya talana ka firirdhsantahay, ayaa labadii xoogweyne soo noqdeen. Wiilwaal bay is hareero taageen iyagoo seefihii oo dhiiggu tifta hayo gacmaha ku sita. Wiilwaal oo weli afka cirka u taagaya, foolkana ururinaya, ayaa haddana labadii nin ku yidhi: «qabta». Sidii oo kale, ayaa laba wadaad lala kala orday aqalkii lala galay oo qub iyo qacdu yeedhay, seefihii oo dhiig lehna mar kale lala soo noqday.

Mar alla markii ay wadaadadii arkeen labadii xoogweyne oo soo noqday, ayey oodda jebiyeen, qabac! . . qayb iyagoo ka mid ah, ayaa bawdkii intii dherer le'ekaa xagga shishe iska dhigay. Colkii fardooleyda ahaa ee debedda tubnaa, ayaa soo qabqabtay wixii fakaday. Wadaadada intii kalena, siday isu garbinayeen ee midba kan kale dusha uga fuulayey, ayaa muskii oogada looga baxay. Iyadoo raggii la moodo biiq la qabtay oo qaar jidhkoodii ooddii jeexjeexday, qaarna dubku ka hoolmay sidii loogu tumayey, nin walibana leeyahay: «Tolow goormaa adna gacanta lagugu dhigi», ayaa Wiilwaal ku yidhi: «waar waa sidee oo maxaa idin helay? Saw idinkii lahaa Ilaah mooyee cid kale lagama cabsado!».

Goortaasaa wadaadadii qaylo afka kala waaxeen: «waar Garaad hanna dhammayn, waar Garaad hanna dhammayn!» Wiilwaal baa kolkaa yidhi: «haddaba ma ogaateen in Ilaahayna laga cabsado, aadmigiisana laga baqo ? Maanta ka dib, wadaad hub la'yaan la rakin. Wadaad walowba qalabkaaga qaado oo dadkaaga dhinac ka raac».

**Laylis :**

1) Ma Wiilwaal baa toosnaa mise wadaadka ?

2) «Raggii oo la moodo biiq la qabtay». Maxaa ka dambeeya ee weedhan loola jeedaa ?

3) Muxuu ula jeedaa «fool ka fool isu hortaagey», «dhoosha ka qosley», «qeylo dirta», «gafuurka cirka u taagey».

4) «Gadaal buu u boodey sidii uu dab ku jaagsaday». «Madaxuu xaggan u ruxey oo dhafoorka qabsadey», weedhan waxa ka muuqdaa waa maxay ?

5) Afartii wadaad ma dhab ahaan baa loo diley ?

6) Dulucda sheekadu waa maxay ?

**Maahmaaho :**

1) **Arrin nin galay eed gel.**
2) **Af wax dhaafay afeef dhaaf.**
3) **Allena la kala baryi og ereygana la kala oran og.**
4) **Afkaaga waxaad ka tiraa agtaada ka day.**

**Halxiraale :**

Waxaa habeenkii daaqa aan maalintii daaqin.

## Casharka III

## DHAQANKA ISBEDDELKU KU DHAGAY (Gabay)

Gabaygan waxaa tiriyey Xaaji Cabdi Cabdillaahi Muuse. Xaaji Cabdi, waa gabayaa caan ah gabayo badanna leh, waxaannu ku noolyahay Burco, magaalo madaxda Gobolka Togdheer. Aabihoo, Cabdillaahi Muusana, waa gabayaa weyn oo aad loo yaqaan gabayo badan oo hiddaha iyo dhaqanka aad ugu wanaagsanna tiriyey. Gabaygan soo socda wuxuu tiriyey markii uu arkay in dhallintii soomaaliyeed ay dhaqan habowday kana tagtay wixii Soomaalidu hiddaha iyo dhaqanka u lahayd, siiba dhaqashada xoolaha oo laf dhabarka dhaqaalaha soomaaliyeed ah, diinta Islaamka iyo kaalmaynta iyo waxtarka dadka saboolka ah. Dhallinyarada wuxuu tusaalaynayaa in kaalintii ay kaga jireen dhaqanka iyo hiddaha soomaaliyeed ay gabeen odayaashii taa dayactireyna ay dhammaanayaan. Wuxuu yidhi :

**Duqaydii dhammaatee, tolow, dirirka yaa eegi ?**
**Dabshidkii hadduu galo, ayaa dhuxulihii daadin ?**
**Ayaa daaha laantii ku xidhi, qudhac intuu diiro ?**
**Degmo tuhun ma guurtee, ayaa sahanka loo dooran ?**
**Reerkoo yagleel degay, ayaa guri u soo deyri ?**
**Hangoolkiyo degsaarkii, ayaa gudin u soo daabi ?**
**Haddii geelu dayr dhalo, ayaa doobiga u qaadan ?**
**Dugaagiyo qaniinkiyo ayaa daabta ka ilaalin ?**
**Almadar* duug ma reebtee, tolow, dumarka yaa guursan?**
**Tolow, yaa dadkoodii wax siin, gacal ma doonaane ?**
**Tolow, deynka yaa bixin, gashiga kama dambeeyaane ?**
**Tolow yaa kitaab daalacanoo diinta cid u sheegi ?**
**Anuunbay iska daalee naftaba uma dedaalaane.**

L a y l i s :

1) Erayadan gabayga laga soo guray mid waliba halkay ku jirto adoo la kaashanaya micnahooda sug : dirir, dabshid, dhuxulo, sahan, yagleel, deyr, hangool, degsaar, gudin, daab, dayrdhal, doobi, dugaag, qaniin, duug ma reebto, gashi kama dambeeyaane, yaa kitaab daalacan, naftaba uma dadaalaane.

* Dhallinyaradii dugsiyada Gobollada Waqooyi dhammaystey ayaa loo yiqiin «ALMADAR».

2) Tuducyadan laga soo qaaday gabayga micnahooda sheeg :

b) duqayadii dhammaatee, tolow, dirirka yaa eegi?

t ) dabshidkii hadduu galo, ayaa dhuxulihii daadin ?

j ) degmo tuhun ma guurtee, ayaa sahanka loo dooran ?

x) Haddii geelu dayr dhalo, ayaa doobiga u qaadan ?

3) Tuduca tobnaad;

Tolow, yaa dadkoodii wax siin, gacal ma doonaane?

b) dadka laga hadlayaa waa kuwee ?

t ) maxaa gabyaagu ugu calaacalayaa dadkaas ?

j ) markaad weynaato muxuu waalidkaa kaa mudanyahay ?

4) Gabaygan kumaa curiyey ) Yuu la hadlayaa ?

b) hangoolka iyo daabka gudimaha maxaa laga sameeyaa ?

t ) gudimaha, hangoolka iyo degsaarka maxaa lagu qabtaa ?

j ) maxay ku kala duwan yihiin guriga yagleesha ah iyo ka jabadka ahi ?

x) sahanku kaalintee buu kaga jiraa dhaqanka miyiga ?

kh) dugaag iyo qaniinku maxay yihiin ? Xoolaha dhibtay u geystaan maxay ku kala duwan yihiin ?

d) gabaygu muxuu uga jeedaa dhallinyaradu naftooda uma dadaalaan ?

Casharka IV

## NIMAAD DHASHAY KUMA DHALIN

Bil iyo bar ayaa ka soo wareegtay geeridii Iddiris xaaskiisa wuxuuna galabtaa dhex fadhiyay daaradda gurigiisa. «Aabbo, Warmoogey, markaan ku arkaba hooyadaa baa qalbigayga ku soo maaxanaysa». Iddiris ayaa sidaa yiri isagoo dhabta ku haya yartiisii oo hadba dhunkanaaya. Nasiib-ku-roone, waa Iddiris, wuxuu aad u jeclaa inantiisii yarta ahayd waxaana caada u ahayd kolkuu guriga ka baxaayo iyo kolkuu soo galaba inuu dhunkado. Ballan wuxuu ku qaaday inaan inantiisu weligeed waxay u baahato u ciishoon oo had iyo goor inay faraxsanaato uu ku dadaalo. Yarta waxaa u hayn jiray gabdhihii gurigiisa uga shaqayn jiray wuxuuna kala dardaarmi jiray oohinta. Wuxuu u bixiyey magacyo dhawra oo ay ka mid ahaayeen : **Warmoog, Abyan, Dhimbilo** iyo kuwo kale. Warmoog hadday kortay ooy toban jirtay waxay noqotay inan cabban oo Aabbeheed ka anfariirisay. Aabbeheed waxay ka codsataba wuu la jeclaa waxayse ku kallifi jirtay waxyaalo in la sugo u baahnaa. Mararka qaarkood waxay weyddiin jirtay Aabbeheed waxyaalaha ay ka mid ahaayeen: «Hassan weynaado sidee yeeli doonaa, Aabbe ? Yaa i aroosi doona ? Gusi sidee ah ayaa la igu aroosi doonaa ?» iyo kuwa kale oo fara badan. Warmoog magac kale ayaa Aabbeheed u bixiyey wuxuuna ahaa Koranwaa, mid u qalmana wuu ahaa.

Nasiib-ku-roone gurigiisa qof aan isagu u idmin weligii ma soo gelin, Koranwaana cid guriga ugu iman kartay ma jirin. Waxaa inantii ku adkaatay siday u arki lahayd dhallin yaraday dugsiga isku barteen. Dugsiga baabuur ayaa lagu geyn jiray lagagana soo celin jiray sidaa awgeedna waqti ku filan ooy kula sheekaysato jaallayaasheed ma ay heli jirin. Inanta Aabbeheed uma oggolayn in iyada cidi u timaaddo ama iyadu cid aaddo. Halkaa waxaa ka dhashay in ay gabadhii Aabbeheed collaad weyn u qaaddo aadna u necbaato. Marar badan ayay Koranwaa jecelaatay in Aabbeheed dhinto. Kol adooga infuluwensa ku xumaatayna waxay istiri dhimashadiisii baa soo dhawaatay. Markii uu doorsadayna aad bay uga naxday waxayna u qaadan weydey arrimihii ay isa saarsaareysay oo waxba ka rumoobi waayeen. Koranwaa Aabbeheeda, nasiib-ku-roone, maalintay iyadu dhalatay iyo markay weynaatay ee

naag gurigal ah ay noqotay isku si ayuu u jeclaa. Jacaylkii uu inantiisa u hayay wuxuu geyaysiiyay inuu guurkii iska daayo maxaa yeelay wuxuu ka baqay in ay isku xumoobaan. Ayaan darraduuse waxay ahayd odayga oo inantiisii indha kale ku aragtay, oo laga indha saabay fiicnaantiisii iyo xannaanadiisii.

Koranwaa way fekertay waxayna istiri: «sidee baan odayga u dilaa aan dhibtiisa ka raystee ?» Waxay intaa ku dartay, «haddaan sun u qariyo sow ka ilhelimaayo ?» Markay gabadhu sidaa ku fakiraysay ruuxeeda, odaygu wuxuu ku maqnaa talo kale. Wuxuu fahamsanaa in gabadhiisu maqnaanshihiisa ka heli jirtay hadduu meel aadana ay ugaba sii fiicnyad. Odaygu wuxuu ku tashaday inuu xajkii u kaco, waxaase ku adkaaday inuu Koranwaa ka tago. Ugu dambaystiina wuxuu ku goostay talo inuu ruuxeedaba xajkii u kaxeeyo. Galab mar ay ahayd ayuu Iddiris u yeeray gabadhiisii wuxuuna ku yiri: «maandhe, waxaad ii raacaysaa xajkii, waxaynu bixi doonnaa todobaadkan, ee alaabtaada uruurso». Koranwaa aad bay uga naxday warkaa isaga ah, illayn waxayba rabtay inay Aabeheed disho laba beri ka dib. Markaas baa waxay tiri: «Aabe, naag baa dhar ii toleysay ee aan sugno». Runtiina waxay rabtay in ay labada beri dhexdooda kaga gaarsiiso dhunkaasha baadi doonkeeda. Odaygii isaga oo faraxsan ayuu ogolaaday arrintaa.

Sir ma qabe allow sahan ah ee subaxii dambe ayaa wiil yar oo odaygu wax u dir diran jirey odaygii u soo sheegay in Koranwaa ay gurigii habarta feelelonga ah joogtey, oo ay ku lahayd waxan rabaa inad sun aan aabahay ku dilo ii samaysid. Odaygii intuu orod boobay ayuu gurigii habarta daf yiri, oo arkay gabadhiisii oo koob wax biyo u eg ku sidata. Koranwaa markay aragtay aabeheed oo dul taagan ayey naxdin suuxday, habartiina intay qaylo dhegaha is-qabatay bay tiri: «Yaa kuu amray inaad gurigayga soo gasho.»

**Layli :**

1) Inanta hooyadeed xaggee bay jirtaa ?
2) Maxaa ku tusaya inuu Odaygu gabadhiisa jeclaa ?
3) Koranwaa maxay Aabeheed kula colowday ?
4) Idiriis gabadhiisa wuxu ku tashaday inu xajka u kaxeeyo waayo ?
5) Koranwaa hadimadii ay Aabeheed ugu talisay ma ku guulaystay ?

## Casharka V

## KALA SINAAN (geeraar)

Geeraarkan hoos ku qoran, oo aanu qayb uun ka soo qaadanay, waxa tiriyey alla how naxariistee, Jaalle Cabdillaahi Suldaan «Timacade» 1964kii uu arkay dadkii soomaaliyeed ee halganka dheer ee gobanimadoonka ah ku soo jirey, oo markii xornimo siyaasadeed iyo laba gobol midnimadood la heley, halkii ay dagaal xornimo iyo horumar dhaqaale in loo horkaco ka sugayeen, gumeysi cusub, qabyaalad iyo musuqmaasuq lagu celiyey.

Doorashadii 1964kii markii nimankii taliska siyaasadda hayey ay dadkii qabyaalad ku qaybiyeen, ee si foolxun dadkii lacag ugu kala jiiteen, ayaa Cabdillaahi Suldaan isagoo taas ka xumaaday curiyey geeraarkan (halkan kuma dhama). Wuxuu si qaaya leh u muujinayaa habkii fooshaxumaa ee dadka lagu qaybiyey, dhibaatada gumeystaha cusubi dadka ku hayey iyo in nabadgelyada ummadda iyo horumarkeedu ku jiro midnimadeeda. Geeraarkaas wuxuu ku yidhi :

**Rag sagaashanka dhaafay, oo**
**kebed soohan la moodaa,**
**baruur saafiya moodayoo**
**gadhka saynta maggaankiyo,**
**sambab loo lulayaayoo,**
**la sii jeedinayaa.**

* * * *

**In Soomaali la laayey, oo**
**lagu saydhey rasaas, aan**
**sanqadheedii baxayso,**
**Saalax waate ku eegay,**
**ummadeenna sidaas ahee**
**leegana seedaha goysay**
**saancad baa ka ifaayo**
**dayaaraadka sabbeeyiyo**
**saddex qaylo maqlaynoo**
**suubanow Baarlamaankuna**
**ninna daah kama saarna,**
**isticmaar ku salabeeyeyee,**
**nin siraa hodmimaayoo,**
**sun baa maanta qarxeysee**

**Soomaaliyey ka fogow**

* * * *

**Sabateeduna waa,**
**nimankaynnu wax siinayee,**
**subaxii arbacaad,**
**sabbaxiyo watiiniyo,**

subxanaad lagu dhaarshayee,
ma seetayste wadaad ahoo
subxaanow watacaale
sida weeye lahaa, iyo
nasrigu waa sir ilaahay,
hanti waa laga siibay
kitaab saaray gacmaa, iyo
socodsiiyey distoorka, oo
sangafuur qabadsiiyayoo
kuwii baa dhex saluuganoo,
ninkuu doonaba siiyoo
saabkuna dhaansami maayo.

* * * *

Inta reer saxardiid iyo,
reer samaale tihiinee,
cuqaashii sanqallooc, iyo
idin seexinayaan,
salka meel aad dhigtaan,
saabuun xoor laga waayiyo,
sina loo arki maayo,
reer sarreeye dubbeeyiyo,
suldaan caarshe ogaa, iyo
subax kiinna casheeyaa
sallaan aad ka baxdaan iyo
sacabkoo timayeeshiyo,
waa dameer san madow, oo
waanay suurta geleyn.

* * * *

Weyddiimo :

1. b) Ragga da'da ah ee Cabdillaahi geeraarkiisan ku bilaabay muxuu ka sheegay ?

   t ) Baruurta saafiga ah muxuu uga jeedaa ?

   j ) Ragga da'daasa yaa sidaa u geleya, waxa laga sii jeedinayaana waa maxay ? Dadka intiisa kale caynkaa ma la qabaan ?

2. b) Yaa laayey soomaalida geeraarkan lagu sheegey ? Arrintooda maxuu taliskii markaa jirey ka qabtay ?

   t ) sharax :

   «Suubanow Baarlamaankuna Saalaxwaate ku eegay».

   «isticmaar salabeeyey».

3. Wadaaddadu waxay «sangafuur» qabadsiiyeen waa maxay ?
«sangafuur halkan maxaa looga jeedaa ?

4. Cidhib-xumada qabyaaladda ee geeraarkan lagaga hadlay faallo toosan ka bixi ?

5. Geeraarkani arrimuhuu ka hadlayo soo koob ?

6. «sacabkoo timayeesha, saabuun xoor laga waayey, dameer sanmadoo» muxuu Cabdillaahi ku tilmaamay inay la midyihiin.

## Casharka VI

## W E B I

Cigaal baa geeloodii la raaciyey. Geela wuxuu ku lahaa hal u gooniya oo wax ka qaaya weyn oo la odhan jirey «Webi». Wuxuu maalintii oo dhan la joogaba, gooray ahayd hiim hiimse ayuu arkay hashiihii oo libaax cunayo. Cigaal baa intuu cararay geela intiisii kale degdeg u ururiyey oo duubay. Markaasaa naxdintii hees aan loo fadhiyin uu geelii ugu heesay oo yidhi :


**Wixii Webi cunay waan arkoo waa il giirraa,**

**Wax dameer le'eg oo ka daba weyn yuu ahaayoo,**

**Waan ujeeeedoo hobayo hiddow.**

Markaa uu Cigaal ku heesayey geela waxaanu ujeedin nin geel jira ah oo maqlayey heestiisana si fiican u qabsaday. Wuxuu Cigaal geelii ku heesaba markuu xareeyey ayuu is yidhi; waar berrito yeelkeedee caawuun ha qadin. Intuu walaalkii oo hoos uga yar u tegey buu yidhi: «Walaal maantoo dhan baan geela la soo joogay waanan qandhaysnahaye hashaada Sulub aan maalo ee adna Webi maal markay xigsimooto». Walaalkii baa yeelay markaasuu Cigaal Sulub maalay, oo dhagida galay.

Markii geela badankiisii la maalay, yaa Webi lays yidhi maala. Illayn waa hal maqane waa la waayey. Cigaal baa la toosiyey oo la weydiiyey hashii Webi. Isaga oo is lulaysiinaya buu yidhi: «waar hashu geeley la socotee qolqolka ka cega». Markii laga quustay baa la yidhi: «waar halkee kuugu dambeysey ?» Cigaal baa yidhi: «hashii xeraday ila soo gaadhaye, malaa way xera weydaaratey». Hashii baa la raadiyey, markaasaa baadidoonkii alla ku hagaajiyey ninkii heesta Cigaal maqlay. Waa lays wareystay. «waar maxaa lagu soo hooyday ?» Baadidoonkii Webi baa yidhi: «wax dhiilla ah ma ogine, idinkuse ?» Ninkii heesta Webi maqlay baa yidhi: «wax dareen ah ma ogin, halbaase naga dibjirtey ee waxba maaragteen ?» « maya. oo goormay luntay ?» «shakibaa naga jira oo ninkii geela raacay war kama haynno.»



«oo hasha magaceed? «Webi, oo miyaad aragtay?» «mayee ma arag, hase yeeshee waxaan maqlay ninka la joogey oo magacii ku heesayey». «oo muxuu lahaa?» Ninkii wuxuu u sheegey baadidoonkii heestii Cigaal Webi u tiriyey. Baadidoonkii oo markan quustay baa gurigii ku noqdey oo ku sii tashaday in Cigaal goobtii Webi la geeyo oo indhihiisa wax la tuso.

Markii gurigii lagu soo noqday yaa Cigaal cadho lagula dhacay oo la yidhi «hadadaa kac oo na tus raqdii hasha aan libaaxii soo dilnee». Ciidankii baa hub qaatay iyo xadhig gar ah. Intii dhexda lagu jirey bay Cigaal weyddiiyeen, «waar waxa isha giiran ee aad aragtay ma waraabuu ahaa?» Cigaal baa hoos isula hadlay oo yidhi «Alla idin kashif, tolow yaa i maqlaayey?» Markaasuu u jawaabay oo yidhi: «dee mayee waa ka weynaa, oo wuxuu ahaa wax dameer le'eg oon u maleeyey libaax». «oo maxaad uga ridi weydey oo u bireyn weydey» Ciidankii baa weyddiiyey.

«Waar miyeydaan maqal libaax nin aan aqoon baa lax ka rita, dee anigu waan aqaan libaaxa». Iyagoo Cigaal sii huruufaya "magacaabe", «meel xun alla ku dhig» yey meeshii gaareen. Waxay ugu yimaadeen raqdii hasha oo keliya. Ciidankii baa ku tashaday inay raqda dul seexdaan oo libaaxii sugaan si loo dilo. Hase ahaatee Cigaal waa caddaystay markiiba oo wuxuu yidhi: «waaryaadha waa nimanka, anigu libaaxii Webi cunay u badheedhi maayo oo gegidan seexan maayo ee meesha innaga mariya». Ciidankii baa kula booday oo u sheegay, «wadnaha cad kaa go'yee sownakan annaba kula joogna, miyaad naga naf jeceshahay». «anigu iyadoo afartaa geesood layga seexdo mooyee, seexan maayo», Cigaal baa u sheegay. «waa hagaage naga seexo». Halkii baa la seexday. Cigaal waa nin maantoo dhan geel ilaalinayee markiiba wuu khuuriyey.

Cabbaar markii la jiifey ayaa libaaxii soo dhigtay, markaasaa, Cigaal mooyee, inta kale illayn diyaar bay u ahayde, gantaalo sida roobka lagaga dhigay oo halkaa lagu dilay.

Maydkiisii inta la soo jiidey, oo sidii waxfadihiya laga dhigay ayaa Cigaal lugta loogu xiray oo laga fogaaday. Dha-

gax iyo qoryo yar yar, ayaa lagu soo tuurtuuray. Cigaal baa isla booday. Wuxuu arkay libaaxa ag fadhiya! Goor alla goor uu booday oo xadhigii goostay mooyee, Cigaal baa sida leebka is ganay isagoo samadaa ka qaylinaya «waar hayaay! Hayaay! Hayaay! . . . .».

Colkii kale ayaa intay qosol jaanta wadheen ka daba yaacay oo gaadhay.

**Laylis :**

1) Cigaal muxuu geela u soo duubay?
2) Heestu maxay tilmaamaysa?
3) Sheeg siduu Cigaal habeenkii isu debberey?
4) Waa maxay dulucda sheekadu?

**Maahmaaho :**

1) **Hadal intuu afkaaga ku jiraa ammaanadaa yahay.**
2) **Doqoni xariga lagu xirayo xusulladay ku sidataa.**
3) **Geel jire geela waana wada jira waana kala jirtaa.**
4) **Wixii lagu faqaa fagaaruhuu yimaaddaa.**

**Googaa**

Dundumo yar duumo kaa xoortey.



1

## Casharka VII

## AFRIKAAY HURUDDOOY (Hees)

Heestan la yidhaahdo «Afrikaay Huruddooy» waxay u baaqaysaa dadka reer Afrika oo ay ku guubaabinayso inay ka dhiidhiyaan gumeysiga saancaddaalaha ah ee ku yimid qaaradda doolaalada budhcadnimada ah. Heestu waxay xusuusinaysaa dadka reer Afrika sidii loo kala iibsan jirey ee haddii loo baahdona loo rari jirey sida xoolaha. Heesta waxa curiyey Ismaaciil Xirsi Ciise (Farxaan).

**Hobeey! Afrikaay huruddooy! Cadow ku heeryee, huruddooy!**
**Halyeyadaadii, huruddooy, haad baa cunaayee, huruddooy!**
**Haamaa la saaraa, huruddooy, hayin sidiisaa, huruddooy, la hoggaaminaayaa**

* * * *

**Dulli lama hillaabtee, aaway hanaddadaadii?**
**Doqon baa habowsane, weligood hallowsane, sida xoolihiibaa xero nalagu hooyaa.**

* * * *

**Habeenna badan baan, huruddooy, hammuun ku seexdee, huruddooy.**
**Hiirtaanyo awgeed, huruddooy, la hadliwaayee, huruddooy.**
**Caanihii hashaydaan, huruddooy, haleeli waayee, huruddoooy, la iga hooyaa.**

* * * *

**Dulli lama hillaabtee, aaway hanaddadaadii?**
**Doqon baa habowsane, weligood hallowsane, sida xoolihiibaa xero nalagu hooyaa.**

* * * *

**Horor waraabaha, huruddooy, waaxyaha ku haystaa huruddooy,**
**Oo hantiwdaadii, huruddooy, ka hirqanaayee, huruddooy, aad hagaagi doontaa.**

* * * *

**Dulli lama hillaabtee, aaway hanaddadaadii?**
**Doqon baa habowsane, weligood hallowsane, sida xoolihiibaa xero nalagu hooyaa.**

**Laylis :**

1) Muxuu abwaanku u dhalliilay qaaradda ee u leeyahay «Afrikaay huruddooy?»

2) Tuduca ah «haamaa la saaraa . . . . . la hogaaminaayaa» waqtima ayuu abwaanku taariikhda ka tilmaamayaa?

3) Sidee buu hantida Afrika gumeystuhu uga hirqanayaa?

4) Maxaa innagaga habboon gumeystaha dhibtaa inna soo mariyey inaan kula kacno?

## Casharka VIII

## OLOLAHA HORUMARINTA MIYIGA (Gabay)

Cali Cilmi Af-yare wuxuu ku dhashay meel ku aaddan Sanaag cidhifkiisa bari. Intuu dhallinyarada ahaa wuxuu ahaa hoobal aad ciyaaraha u jecel. Magaalooyinka markuu soo galay wuxuu qayb weyn ka qaatay halgankii gobanimo doonka. Muddo dheer wuxuu gabyaa ugu shaqaynaayey, welina ugu shaqeeyaa, Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta dadweynaha halkaasoo dadku aad ugu barteen caanna uu ku noqday gabayo murti leh oo ku baahsan wejiyada nolosha. Sababta gabaygan uu u curiyey iyo ujeeddadiisaba waxa laga garan karaa marka la akhriyo gabayga.

**Waar Soomaali duullaanka iyo dirirta ay heyso,**
**dunjigoodba qiirada gashiyo dooyada isdhaaftay,**
**duurkiyo miyiga loo kacee lagu dareeraayo,**
**danta loola jeediyo macnaha daallin baa garane,**
**dulucdiyo runtii waa jahliga inaynu duugnaaye,**
**dab munaafaq shiday baa la yidhi duul dhan buu gubaye,**
**dullaalbaa arlada meeraayiyo tuug la soo diraye,**
**adoo daacad wada bay si kale wax u duwayaane,**
**dacar iyo dhunkaal uga qadhaadh malabka Doocaane,**
**ducaqabaha iyo kii sanbaa looga digayaaye,**
**afkeennii la dilay wey-yadaa loo dikriyayaaye,**
**nimankii dusha cadaa waxay naga daboolaanba,**
**dibindaabyo koodii waxay nagu duduucaanba,**
**dhaqankeenna doorka ah waxay hoos u dumiyaanba,**
**daayeerka gerigii Sanaag uga dul geeraaray,**
**oo hawdka goortuu ku diley dib uga sheekeeyey,**
**dalanbaabi iyo ciil wixii dacas na soo gaadhay,**
**doqontaa ilowdiyo nimaan damac ku noolayne,**

dulliqabaha beentiyo fidmada kugu darrooraaya,
dabadhilif shisheeyahay la jiraa nooma duurxulo e,
dadnimadaada oo muuqatiyo duubigiyo xoogga,
dugaag iyo cadowgii ku neceb way derderayaane,
innagoo danteeniyo ogsoon waxaynu doonayno,
dalku waa u baahnaa fartee cidaha deeqsiiya,
durdur iyo rakaad waa inaad ugu dadaashaane,
deelqaafku waa ba'anyahaye daacad ugu sheega,
yaan xarafku dalab yeelannine diirka uga qaada,
murtidii la duugaayey iyo dogobka nooleeya,
dildilaacsha maansooyinkaa dahab ka buuxaaye,
dararta iyo heesaha macaan looxa ugu duuga,
duuduub wixii kugu noqdaa kaama daadego e,
siyaasadda la doortiyo waddada doogga lagu gaadhay,
hantiwadaagga baaqiisa iyo dawladnimadeenna,
duqu haddalladuu sheegey iyo waxaynnu doonayno,
Ugu dara durrustaad dhigtaan garasho waa doore,
dacwadaasu waa macallimida midaan dareensiiyey,

L a y l i s :

1. b) Goormaa lagu dhawaaqay far Soomaaliga qoristiisa?

   t ) Ololaha cidhidb-tirka akhris iyo qoris la'aanta goormaa laga bilaabay magaalooyinka, hadmaasela dhameeyey?

2. Tuducyada 1, 2, 3, 4, iyo 5aad,

   miyiga sida qiirada leh ee ardayda dugsiyada, barayaasha iyo dhakhtaradu ugu dareereen danta laga leeyahay waa maxay? Adigu ololahaas ma ka qaybgashay? Haddii aadan ka qaybgelin dadkii

ka qaybqaatay mow bogtay? Maxaa kaa reebay? Haddaad ka qaybgashay halkaad ka shaqaysay? Dad intee le'eg baad wax bartay?

3. Tuduca lixaad:

   b) Munaafaqu dabkuu shiday ee lagu gubtay waa maxay?

   t) Yaa ku gubtay? Munaafaqa gabayaagu halkan kaga hadlaayaa waa ka jaadkee ah? Ma waafaqsan tahay in dabkuu shido lagu gubto? Maxaad ku ciqaabi lahayd munaafaqa jaadkaas ah?

4. Tuduca shanaad:

   b) Dullaalka iyo tuugga la soo diray ee arlada meerayaa ma jiraan? Sidee baa looga hortegi karaa? Ma soomaalibaa, ma caddaanbaa, ma Afrikaan kalaa mise cid walba way leeyihiin?

5. Tuduca lixaad:

   b) Si tifatiran tuduca u sharax.

   t) Doocaan waa xaggee?

6. Tuduca toddobaad:

   Duca-qabaha iyo ka san ee loo digayaa waa kuwee? Maxaase looga digayaa?

7. b) Tuducee baa ka hadlaya in maanta afkeenna qoran loo wada ordayo, dadka badankiisiina bartay, inta kaleena ku dedaalayaan barashadiisa?

8. Intaan afkeenna la qorin, afkee baa wax lagu baran jirey? Dhibaato se ma ka iman jirtay?

   b) Gaaladii isticmaarka ee dhulkeenna berigii gumeysiga xukumi jiray waxayaabo badan oo aynnu hidde iyo dhaqanba u leenahay ayey inna nacsiiyeen. Tuducee baa muujinaya inay afkeenna qaayihiisa iyo murtidiisaba innaga qariyeen oo ay inna nacsiiyeen?

t ) Tuducee baa muujinaya gaaladii isticmaarku inay afkoodii ina jecleysiiyeen? Ereyga« Dudduuceen» maxay kula tahay inuu gabaygu u isticmaalay?

9. Tuducyada 15 iyo 16:

Daayeerkii iyo gerigii Sanaag sheekada dhex martay waa maxay? Muxuu gabaygu ula jeedaa?

10. Tuducyada toddoba iyo tobanka iyo siddeed iyo tobanka maxaa ka dhexeeya? Gabayaagu muxuu ula jeedaa mase ku raacsan tahay?

11. b) «Dadnimadooda oo muuqatiyo duubigiyo xoogga, dugaaga iyo cadowgii ku neceb wey derderayaane» labadan tuduc sharax. Gabayaaga ma ku raacsan tahay siduu leeyahay?

t ) Sidee dadnimadaada iyo xooggaaga (ama xagga dhaqaalaha ama cududda ha ahaatee) ummadi u muujin kartaa?

j ) «Innagoo danteeniyo ogsoon waxaynu dooneyno», tuducan macnihiisa, iyo waxa gabayaagu ka hadlayo guud ahaan, adoo maskaxda ku haya, waxaad ka hadashaa danta aynnu ka leenahay ololaha horumarinta baadiyaha? Tuducyada muujinaya sheeg?

x) Waxyaabahaas laftoodana sheeg?

12. b) Murtidii la duugaayey iyo dogobka nooleeya, dildilaacsha maansooyinkaa dahab ka buuxaaye. Si deggan intaad ugu fiirsato macnaha labadan tuduc ka hadal murtida ka dambeysa.

t ) Tuducyadee ka hadlaya in Hantiwadaagga ulajeedooyinkiisa qaranimadeenna iyo aqoonta kaleba si tifaftiran loogu dhigo dadka Soomaalieed ee baadiyaha ku dhaqan?

Casharka IX

## LAANTA CAAFIMAADKA (WHO) (curis)

Waxa jirta laan caafimaadka adduunyada u qaybsan oo Jamciyadda Quruumaha ka dhaxaysa ka tirsan. Laanta waxa la sameeyey bishii Abril todobadeedii, kolkii sannadku ahaa 1948. Laanta xarunteedu waa magaalada Janiifa ee dalka Iswisarlaand (Switsarland). Sideed iyo toban dawladood oo dawladaha laantta ku jira ka mid ah ayaa hadba doorta dadka laanta ka shaqeeya.

laanata caafimaadka cudurada ay wax kaa qabato waxaa ka mid ah cudurka feedhaha ee qaaxada la yidhaahdo, cudurka kaneecada ka kaca ee duumada la yidhaa, cudurada jabtida iyo xabbadda iyo cuduro badan oo kale. Laantaasu waxay caawisaa dalalka soo koreya. Iyadu waxay dhakhtarada kaga duwan tahay meesha cudurku ka soo bilaabmo ayey shaqadeeda u badisaa si waxyaalaha cudurka keenayaa u dhintaa.

Laantaasu waxay yeelataa shirar dawladaha ku jiraa isugu yimaadaan. Waxa kaley leedahay xafiis shaqada maalin walba joogtada ah maamula; xafaaskaas waxa u madax ah oo arrimaha laanta fuliya maamule guud. Laantu waxay xidhiidhisaa wixii shaqooyin caafimaad ku saabsan, ee dalalka dunida ka socda. Laantaasu adduunyada aad bay xagga caafimaadka uga taageertaa, laba daraadle dalalka soo koraya.

Sannad kastaba bisha Abriil todobadeeda ayaa xusuus loo sameeyaa, oo ah kolkii laanta caafimaadku ay dhalatey.

**Laylis**

1. Goormaa la aasaasay laanta caafimaadka adduunka?
2. Maxay qabataa laantu?
3. Dalalka ay caawisaa waa kuwee?
4. Sidee bay cudurada ula dagaallantaa?
5. Cudurrada ay la dagaallanto wax ka sheeg?

## Casharka X

# O G O W

«Ogow» oo ah hees dadka soomaaliyeed ogeysiineysa uguna digeysa dhibta iyo cirib xumada cadowyada aadamiga, siiba saddexda halista ah: jahliga, gaajada, iyo cudurka, waxa tiriyey Xasan Cabdi Nuur oo ku dhashay ıngaalada Qardho, sannadii 1954. Abwaanku wuxuu tilmaamayaaye kale qiimaha uu leeyahay wadajirka iyo isku duubnaanta meel looga soo wada jeesanaayo cadowyada.

**Gumaystaha haddii aan guruxyadu arkaynoo**

**gacantuna la dirirayn marna gaacan maayee ——— ogow**

**gaajada haddii aan laysu geynin xooggoo**

**geesigii u diriraa gobanimada curiyee**

**gees laga abbaarin marna guuri mayse ——— ogow**

**guunyada ninkii laa gaaxdeeda maale**

**geed maale roobbaa geedaha ka saaree———ogow**

**go'aankiyo ujeeddada waxaan uga gollenahay**

**nin walbow gilgilo oo geyiga u shqeeyoo**

**geestaada ka dhawr goldaloolada.**

**Jahligii gaboobaan garashiyo aqoon weyn**

**gunta lagaga goyneyn marna gaacan maayee ——— ogow**

**cudurkii qaantooboo gaasiray adduunka,**

**oon laga gacan sarraynin marna guuri maayee ——— ogow**

**hawsha garabsigeeaad guusha lagu hantaayee,**

**garsoor iyo mudnaan baa geyi lagu dhaqye,**

**geedigii hayaamaa durba rayska gaadhee ——— ogow**

**go'aankii ujeeddada waxaan uga golleenahay**

**nin walbow gilgilo oo, geyiga u shaqeeyoo**

**geestaada ka dhawr goldaloolada.**

**Laylis :**

1. Imisa cadow ayaa heestu tilmaamaysaa?
2. Muxuu abwaanku uaga horreysiiyey gumeysiga cadowyada kale?
3. Si ballaaran u faahfaahi sida gaajada loo dabar jaray?
4. Muxuu uga dan leeyahay abwaanku tuducyada:
   b) geesigii u diriraa gobanimada curiyee,
   t ) guunyada ninkii laa gaaxdeeda maalee,
   j ) geestaada ka dhawr goldaloolada!;


Casharka XI

## RAH QAAMAYSAN

Waxa la yidhi rah baa amaah qaatay isagoo gaajo xumi hayso. Rahu wuxuu ballan ku qaaday inuu qaanta isku bixiyo muddo yar dabadeed. Hase yeeshee, ballankii muu oofin. Markii ciddii qaanta ku lahayd weydiisatey qaantiina, wuxuu ku yidhi: «waar yaa waa ninka, waxaan kuu sheegayaa annagu goortan oo kale ma miyir qabno maxaa yeelay, roob baa noo da'ay, haddaanu rah nahayna, goortan qoob walba biyo noogu jiraan waanu waalannahay, ee marka aad wax miyir qaba aragto, wax weydiiso. Ka dibna, ruuxii qaanta raha ku lahaa wuu ka noqday, isagoo la yaabsan.

Beri dambe ayaa ninkii, rahii ku soo noqday, isagoo jiilaalkii axasha dhigay oo rahiina dhoobada ku naban yahay. Markaasuu rahii ku yidhi, «waar yaahee waa raha, bal warran iminkana». Markaasaa rahii intuu naxay yidhi, «alla, waar miyaan in yaroo naxariis ihina wadnahaaga ku anban? Ma goortaan oo kale ayaa lays qaannamaa? Sawtan aynnu jiilaal caddaaga ku jirro». Intaa dabadeed, ayaa ninkii qaanta ku lahaa haddana dib uga noqday, waxaasuu ku yidhi: «imminkana waan kaa noqon, waayo kaadi badane waa loo gogol badiyaa. Waxaadse ogaataa, marka markan xiga inaanan dib kaaga laabmi doonin».

Ninkii qaanta lahaa, kolkuu dhawr bilood ka maqnaa, ayuu mar danbe ku soo laabtay iyadoo gu' fiicani da'ay oo rahiina meel kastaba ka qaylinaayo dhaa ——— dhaaa ——— dhaa ——— kolkaasuu ku yidhi: «waar rahow! Maantana maxaad odhan. Si aan kaaga noqonayaa ma dhaqnee, wixii inna kala saaraya yeel». Dabadeed, rahii baa hadloo wuxuu yidhi: «waar yaa waa ninka, xilligan oo kale ruuxii wax na weydiiyaa waa nin dunida aan la socon. Maantoo kale rah dhego uu wax ku maqlaa kuma yaalliin. Bal iska noqoo waa danbe oo wax la kala garanayo hay noo ahaato». Markaasaa ninkii intay cadho dhag ka tidhi, qaaro weyn halkan booday oo rahii oo nicmo awgeed bararay la dhacay. Rahiina intaa wuu qaylinaayey. Waxaana la yidhi: «Raha waxaa cida badan ugu wacani waa xanuunkii dharaartaa ninkaasu baday.



**Laylis :**

1. Gaajadu maxay ku kalliftay rahii?
2. Maxaa waalay raha? Waayo?
3. Sidee buu qaantii uga baxay?
4. Dulucda sheekadu waa maxay?

**Googaa:**

Meesha mar oo muuqaa la waa.

## Casharka XII

## HAYS-XAKABIN MEEL (Gabay)

Meesha la yidhaahdo Laasadaar ayuu Ismaaciil Mire ku dhashay sannadku markuu ahaa 1872kii. Yaraantiisaa, Ismaaciil, wuxuu ahaan jiray xoolo dhaqato. Da'diisu markay ahayd labaatan sanno oo wax yar la', wuxuu ku biiray ciidamadii daraawiishta oo uu sida runta ah ahaa raggii wax ka aasaasay. Nin lagu yaqaan dagaalyahanimo, Sayidkana aad ugu hogaansaanaa halgankii Ingiriisku uu kula dagaalamayey, ayuu ahaa. Wax badan baanu xaaskiisa wakhti uu ku arko u heli jirin. Dhowr goor ayuu abaanduule u ahaa ciidamo daraawiish ah oo soo hooyey lib aad u weyn sida ciidamadii Ingiriiska kaga guuleystey meesha la yidhaahdo «Dulmadoobe». Dagaalyahanimada ka sokow, Ismaaciil wuxuu ahaa gabayaa weyn oo degaankiisa caan ku ahaa. Gabaygan soo socda wuxuu ku waaninayaa inamadiisa inan ka mid ah oo uu saluugay markuu arkay isagoo dhalinyararanimo iyo ciyaaro jiiteen. Wuxuu yidhi:

**Caliyow xusuus kugu dullee weled xumaadaaye,**

**Xalluun baan xadaas gabay la kacay oo xafiiltamaye,**

**Dhaqashaba ha xaaleysanine maqal xaruuftayda,**

**Cabdi iyo Xuseen iyo Xirse baa kaa xusuus badane,**

**Xiniin-yaalihii kula sinnaa xoogsi buu tegaye,**

**Xadka qabada niman baa gudboo soo xakaabsadaye,**

**Niman baa xeryaha deyr ka dhiga xananka toomoode,**

**Niman baa xijiga iibsadiyo xabag qadhoomeede,**

**Niman baa xafaarka u guntada oo xabaal qoda e,**

**Niman baa dayuurado ku xidhan xiima samadaase,**

**Niman baa xarrago quudhsaday oo xaarka iibsada e,**

**Iiraha rag baa Xamar u tegey xeeb intuu maray e,**

**Hablaha xuural-caynta ah rag baa xeel ku guursadaye,**

**Xaajinimada rag baa ku tegey xad iyo laandheere,**

**Wax dhaaxaan sidkaha kuugu xidhay xaaluf iyo dooge,**
**Wax dhaaxaan xagaagii wan weyn xowda kuu jaraye,**
**Wax dhaaxaan sengaha xoodiyo kuu xabbaadh ridaye,**
**Soddon gu' baan ku xasaanshay iyo weliba xaab-xaabe,**
**Kugu xiiqay saan kuu lahaa xaaxayahay toose,**
**Xaguun labada daarood ku daran hays xakabin meele.**

Markii gabaygaa loo tiriyey ka dib, Cali wuu is qaadqaatay oo shaquu raadsaday, waxaana la qoray Askari.

**Laylis :**

1. Erayo laga soo xulay gabayga, oo la sharxay,
   - b) Cabdi iyo Xuseen iyo Xirsi = gabayaagu dhallinyaro uu adeer u yahay.
   - t) qabo = geed haamaha laga tolo,
   - j) xijiga = beeyo, feex,
   - x) liire = lacagta Talyaaniga
   - kh) xuuray-cayn = gabdh aad u qurux badan,
   - d) xabbaadh = qaybta la soo dhaco ee geela ah
   - r) xaawalay = dumarka amase haweenka,
2. Tuduca labaad sharax adoo si tifaftiran uga hadlaya wuxuu gabayaagu u xafiiltamay?
3. Siyaabaha badan ee loo xoogsado isagoo tusaalaynaya, Ismaaciil inankiisa dhawr meheradood ayaa u tilmaamay, si kooban uga hadal meheradahaas iyo qaayahoodaba?
4. Sidee baa gabayaagu u xannaanayn jiray inankiisa, si kooban uga hadal?
5. Tuducee baa muujinaya shaqada in qofkasta oo itaal ilhi uu ku ordayo? Maxaad isleedahay Cali tuducaa korodhsaday?

6. Tuducee baa muujinaya inuu Ismaaciil waxbadan inankiisa waaniyey?

7. Si kooban waxaad uga hadashaa ujeedada guud ee gabayga? Caddee inaad gabayaaga ujeedadiisa raacsan tahay iyo in kale? Hadaad ku raacsan tahay maxaad ugu raacday?

Casharka XII

# TAWRADDII OKTOOBAR

Dalkeenna waxa soo maray sannado badan oo gumeystayaashu gacanta ku hayeen, muddadaana dadkeennay isku dirayeen, kalana kaxaynayeen, kuna wadeen siyaasadda ku mamac dheer «Kala eri aad xukuntide». Gumeysi nacayb aawgii waxaynnu odhan jirrey «Soomaaliyey, in aan kula tol ahayn, oo kaa taag roon oon kuu tudheyn, oon kaa tegahayn, ayaa kuu yimiyee tasho».

Soomaalidu intii gumeystuhu u talinaayeyba waxay ahaayeen dad gobanimada doonaya una dagaallamaya. Markii gobanimada la helay 1960kii, Soomaali oo dhammi meel kastaba ha joogtee way farxeen oo ciyaar bay meel kastaba ka qabsadeen. Yididiilo weyn baa wada gashay, oo ruux kastaaba wuxuu is yidhi haddaad gumeystihii ka raysanaysaa, ood gaajada iyo cudurka iyo cilmi darraantaba ka baxaysaa. Hase yeeshee, wixii ay filanayeen oo dhammi wuxuu noqday wax aan waxba ka jirin. Maxaa yeelay nimankii loo doortay madaxnimada dalka iyo danahiisa inay maamulaan, yaa noqday kuwo dantii dadweynaha tuuray, dantoodiina gooni u qabsaday. Dadkiina way isku direen, qolo qolay u qaybsheen, sidii gumeystuhu yeeli jirey. Hantidii dadkana way boobeen. Dabadeedna iyadoo hoog iyo balanbal lagu jiro, ayaa ciidanka qalabka sidaa adkaysan waayey. Sidaas daraadeed bay awooddii dalka ula wareegeen 21kii Oktoobar 1969kii. Tawraddu sidaasay u dhalatay, dadweynuhuna garab iyo gacanba ku siiyey, loona baabi'iyey fool-xumadii dalka lagu maamulayey. Wadajirkii iyo walaalnimadii dalka Soomaaliyeed u baahnaa Tawraddii Oktoobar baa soo celisay, oo soo noolaysay. Arrimihii guddida Sare ee Tawraddu ku dhawaaqday 21kii Oktoobar, ayaa haatan danaha dalku ku socdaan, waana kuwo lagu guuleystey. Dadweynuhu Tawradda dantooda u dadaaleysaa, waa taageersan yihiin. Maxaa yeeley, dadku wuu yaqaan dantiisu halkay ku jirto. Ciddii danahooda walaaqaysana indho gooniya ayey u leeyihiin. Waxase jira dad yar oo ay la qallafsan tahay waxtarka siyaasadda maanta dalka lagu hoggaaminayaa. Kuwaana waxa u habboon inay iimaansadaan talada madaxda dalka iyo siyaadaha la rumay-

san yahay in horumar dhaqso leh iyo barwaaqoba lagu gaadha-yo.

**Laylis :**

1. Xornimada ka hor maxay ku dhisnayd siyaasadda gumeystuhu?
2. Muxuu dadku filanayey dhalashadii calanka 1960kii?
3. Maxaa lagala kulmay xukunkii dadkii la soo dooran jirey?
4. Maxaa ku kallifay ciidamada qalabka sida inay xukunka gacanta ku dhigaan 21kii Oktoobar 1969kii?
5. Wax ka sheeg waxyaalihii isbeddelay?

## Casharka XIV

## BURAANBUR (Guubaabo ah)

Waxaa tirisay Xaliima Soofe oo ku dhalatay magaalada Gaalkacyo 1925kii, hadaladeedu qiiro ayey leeyihiin, had iyo jeerna waxay guubaabin jirtay dadweynaha si ay uga gilgishaan waxyaalaha foosha xun, waxaanay tilmaami jirtay horumarka hase yeeshee kacaankeenna ka hor dheg looma jalaq siin jirin.

Mar Adi Sababa go'aan beenbeen ah laga soo saaray waxay shicibka ku tidhi:

**Waa tii Afrikaanku ururoo la wada ogaa.**
**Waa tii Adis-Ababa lagu qaatay aaminnimo.**
**Waa tii lagu ooday Afrikaanku wey isku aqal.**
**Aaraa'adii iyo hadalkii waa tii la wada ayiday.**
**Adduunka laga sheegay Afrikaanna wada saxeex.**
**Itoobiya waxa ka dhacay waa la wada arkaa.**
**Waxay ku ahaatay yaa ii iftiimin kara?**

* * * *

**Diigocikii Faransa dhinac buu ii duban hayaa.**
**Doollarkiyo lacagta dahab buu ku iibsadaa.**
**Hadba ninkuu doonayuu dawa kula dhigtaa.**
**Sidii geel dayr dhaluu doobi ugu sitaa.**
**War diir xaraar ma laha raggii daarta noo fadhiyey.**
**Dadyow Soomaaliyeed waad ka daahantay.**
**Waa dareen culuse Shicbkow ugu istaag.**

* * * *

L a y l i s :

1. Gubaabadatan maxaa ku kallilfay?
2. Maxay dadka ugu baaqaysey?
3. Afrikaanku maxay u ururreen? Halkayse ahayd?

Casharka XV

# WAARIMAYSIDE

## WAR HA KAA HADHO (Hees)

Heestan ku halqabsatay maahmaahda la yaabka leh, waxay dib ugu noqonaysaa taariikhda Soomaaliyeed iyo dadkii geesiyada ahaa ee naftooda iyo hantidooda u soo huray dalkooda. Abwaanku isaga oo dad badan tusaale u soo qaadaya sida ay naftoodii macaanayd ugu waayeen xoraynta dalkooda, ayuu leeyahay waxay geesiyaashaasi gudanayeen waajibkii ka saarraa dalkooda, sidaas oo kale ayaa laga filayaa qof kasta oo soomaaliyeed inuu tusmo raaco. Heesta waxa tiriyey abwaanka Xasan Cabdi Nuur oo ku dhashay Qardho, sannaddii 1954kii.

**Waayadii horeetiyo waqtigii la soo maray,
Kuwa aan waabanaynoo wedka u bareeroo,
Gurey weerarkiisiyo Sayidkii u weynaa,
Waxay gudanayeen waa dalka waajibaakiisee,
Kolla waarimaysaan, walaalaha soomaalaay,
Waddanka u dhintaay war haydiin hadhee.**

* * *

**Xalenaba Wajaaluu ku wareemay cadow oo,
Wadnahana ku gooyeen, dhagaxtuurna waagii,
Waaxdii haweenkaa Xaawa lagu warmeeyee,
Waxay gudanayeen waa dalka waajibkiisee,
Kolla waarimaysaan, walaalaha soomaalaay,
Waddanka u dhintaay war haydiin hadhee.**

* * *

**Guutadii wahaabiga gumeystaha warjeeftaa,
Weyne guusha siiye, wiiradii xumaydna,
Kuma waarin ciidoo saxalkii wareegye,
Waxay ngudanayeen waa dalka waajibkiisee,
Kolla waarimaysaan, walaalaha soomaalaay,
Waddanka u dhintaay war haydiin hadhee.**

**Laylis :**

1) Muxuu abwaanku ka rabaa waqtigaa hore ee la soo dhaafay?
2) Maxayse ahaayeen Gurey iyo Sayidka uu abwaanku magacaabay?
3) Maxay guteen oo dalka waajibkiisa ahaa?
4) Muxuu uga dan leeyahay abwaanku:
«Kolla waarimayside walaalaha soomaalaay waddanka u dhintaay war haydiin hadhee».
5) Xalane muxuu dalka u soo galay, muxuuse cadowgu u wareemay?
6) Muxuu Dhagaxtuur ina xusuusinayaa?
7) Dagaalka Xaawa ku dhimatay halkuu ka dhacay? Goormuuse dhacay?
8) «Weyne guusha siiyee» waayo dadka uu tilmaamamayaa abwaanku?
9) Ayuu heesaagu ku tilmaamayaa saxalka? Waayo?
10) Ma ka mid tahay dadka abwaanku la hadlayo? Maxaa kaaga habboon dalkaaga iyo dadkaaga?

Casharka XVI

## AAMIN

Waraabe ayaa habar dugaag isugu yeedhay, isaga oo ka dacwoonaaya magaca dhurwaa la dhaho. Wuxuu yidhi: «Waar nimaanyahow, magacan dhurwaa baan la huudmay. Ha la iga daayo». Habar dugaag baa yidhi: «Oo maxaanu kuu bixinaa?» Wuxuu yidhi: «Saddex magac miduun ha la iigu yeedho. Ammaan, Aamin iyo Amiin». Habar dugaag baa yaabay oo yidhi: «Bal waanu ka soo showreynaaye waa inoo saa dambe». Waraabihii durba wuxuu isu diyaariyey Aamin oo wuxuu madaxa ku xidhay maydhax cad isagoo is-miskiininaya iskana dhigaya Aamin.

Habar dugaag oo hal irmaan wada ayaa soo noqday. Waxay yidhaahdeen: «Magacii aad codsatey waa laguu bixinayaa haddii lagaa arko aaminimo. Saddex casho ayaannu kugu eegeynaa hashan iyo nirigteeda. Haddii ay nabad galaan, waannu ku caleema saari oo magacaa dhurwaa markaasaa kuugu danbaysa. Waraabihii iyo hashii lammaanayd baa la isaga tegey, waraabihiina wuxuu ballan qaaday inuu nabad geliyo. Maalintii hore wuu is adkeeyey, maalintii danbe ayuu intay gaajo qabatay is yidhi waar maad hasha garoocatid oo meel aan la arki karin in yar ood ku gaaja baxdid ka goosatid, berriba way bogsane. Afartii naas buu goostay. Maalintii ballantu ku ekaydna nirigtii buu faruuryaha goostay.

Habar dugaag oo magac bixintii u diyaara, ayaa yimid iyadoo waraabihii hashii soo xareeyey. Waxay yidhaahdeen: «Aamin, hasha soo godol». «Duboo murush maarush, duboo murush maarush», ayuu yidhi waraabihii, nirigtii iyo hashii ayaa is-jiqi waayye. Illayn midina waa candha la'dahay midina waa faruuryo la'dahay. Habar dugaag baa yidhi: «Waar maxay hashu u godlan weyday, nirigtuse maxay u jiqi weyday». Waraabaa yidhi: «Waar nirigtu maxay ku nuugtaa maxayse ka nuugtaa». Halkaas buu ku waayey magacii.

**Maahmaaho :**

1) **Caadadii nin ma baajo, bahal caydhin ma daayo, oo caarre waa dhalankii.**
2) **Ntn soort kaa qaadd*a*y waa nin seefi kaa qaadday.**
3) **Hunguri wax ka weyn la mariyaa wuu dillaacaa.**

**Laylis :**

1) Magaca Aamin muxuu waraabe u doortay? Magacu muxuu tilmaamayaa?

2) Tijaabiskii sidee buu uga soo baxay?

3) Muxuu uga jeeday markuu lahaa; «maxay ku nuugtaa maxayse ka nuugtaa?»

4) Waa maxay dulucda sheekadu?

5) Haddaad fahamtay, sheekadan maxaad ka korodhsatay?

**Googgaa :**

Xeradayadu waa wada ul oo ul la qaato malaha.

## Casharka XVII

## SHAAHAAN SHAAHBA AHAYN (Gabay)

Cabdillahi Cabdi Shube waa gabayaa ku caana gabayada maadda, majaajillada iyo murtidaba, waxaanuu ku dhashay magaalada Hargeysa, kuna barbaaray, markii danbena ka shaqeeyey Raadyowgeeda oo illaa hadda uu ka shaqeeyo. Gabaygan hoos ku qoran wuxuu ku tilmaamayaa waxyaalaha aan sidoodii dhabta ahayd ee lagu yiqiinnay ahayn hase ahaatee lagu tilmaamo waxyaalahii dhabta ahaa, iyo waxyaalo aanad markiiba garan karin waxay yihiin:

**Shaah aan shaahba ahayn, shaadh aan shaadhba ahayn,**
**shooki aan cidi joogin, shariiryo aan dux lahayn,**
**Shimbir aan duuli karaynin, shayddaan aan la arkaynin, iyo**
**Sheekh aan sheekhba ahayn bal aan idkiin kala sheego.**

* * *

**Shaah aan shaahba ahayni, waa shaygaramxaali qaboobayoo,**
**Islaantii Shaqlan haysoo, shadaabkii ay ku dartoo,**
**Habro loo shushubaayo.**

* * *

**Shaadh aan shaadhba ahayni waa shaamiis oborkoodha oo,**
**Shaqaalahaa fasishoo, shiraaq buu u egyoo, kaasaan shaadhba ahayn.**

* * *

**Shooki aan cidi joogin, waa xabaasha shareeran, iilka yar ee**
**Ka shisheeya oo, waa shooki aan cidi joogin.**

* * *

**Shariiryo aan dux lahayni, waa *q*uraaca la shiilo,**
**Shaydaan aan la arkayni, waa naag shaadir hagooganoo,**
**Indhihiina shareertoo, shaanbinaysa agtaada, ee yaad ku**
**Sheegi lahayd, waa shaydaan aan la arkayne.**

* * *

**Sheekh aan sheekhba ahayni, Shanbadhyoodliyo Maa'ir, waa**
**Nin faal ka shaqeeyoo, wuxuu sheegay la waayayoo, kaasaan**
**Sheekhba ahayn.**

**Laylis :**

1) Gabaygan yaa tiriyey?

2) Ujeeddada guud waa maxay?

3) Waxyaabaha laga hadlayo sheeg?

4) Iilka tuduca ka hadlaya muxuu gabayaagu ku sheegay? Waayo?

6) Naag shaadir intay xidhatay. indha shareeratay muxuu ku sheegay?

7) Shanbadhyoodliyo maa'ir muxuu ku sheegay?

8) Gabaygani muxuu gabayada kale kaga duwan yahay? Ka hadal.

## Casharka XVIII

## **BURAANBUR** (Kacaan ah)

Buraanburkan waxa tirisey gabadh la yidhaahdo Xaliimo Khayre oo ku dhalatay Eyl 1939kii. Waxaanay tirisay markii Tawradda barakaysani dhalatay, ay aragtayna sida fiican ee ay bulshada Soomaaliyeed ugu baaqayaan horumar iyo barwaaqo, caddaalad iyo sinnaan. Waxaanay tiri:

**Golaha Sare Tawradda iyo geeshka Maxamed wado,**
**Gumeysi ma qaataan ee guushay hoggaamiyaan**
**Garsoor wadayaasha, Rabbiyow gargaarayeel,**

* * *

**Guddiga Sare Tawradda iyo geesigii Siyaad, hoggaankii**
**Bay hayaan oo hawshii wey qabteen, oo wey hagaajiyen**
**Ee waddankeenna, hore u wada.**

* * *

**Siyaad Somali aabbaheed, midkaan horuu u socon,**
**Saafi noo ahayn waa in, siriq lagu ridaa.**
**Kacaanka Oktoobar qodobbadiisu waxay ahayd,**
**Sinma Soomaaliyey, oo yaan la kala sarrayn.**
**Kacaanka Oktoobar qodobbadiisu waxay ahayd,**
**Xaqii Soomaaliyeed yuu xisaab la'aan.**
**Kacaanka Oktoobar qodobbadiisu waxay ahayd,**
**Midkaan Soomaali doonayni inuu socdaa.**
**Kacaanka Oktoobar qodobbadiisu waxay ahayd,**
**Jahli in aan dhaafno, oo jiifka laga kacaa.**
**Kacaanka Oktoobar qodobbadiisu waxay ahayd,**
**Baryo in aan diidno, oo baahi laga baxaa.**
**Kacaanka Oktoobar qodobbadiisu waxay ahayd,**
**Aqoon in la urursho ubadkii dariiqa yiil.**
**Qabiil la diido, jahliga, cudurka, oo baahida jarnaa.**

**Laylis :**

1) Kacaanka Oktoobar muxuu qabtay?
2) Sidee baynnu jahliga u baabiinnaa?
3) Sheeg weedhan ula jeeddadeeda «Siriq waa in lagu ridaa?»
4) Maxaynnu ku sugnaa midka aan hore u socodka ahayn?

Casharka XIX

## WAXTARKA DHIRTA (Curis)

Waxtarka dhirta lama koobi karo, wax yar baannuse tusaale ahaan ka sheegaynaa. Waxaa ka mid ah waxtarka geedaha:

1. Looxaanta daaraha lagu dhiso, kuraasida iyo miisaskana waa laga qoraa.
2. Aqal Soomaaligana waa laga sameeyaa.
3. Xaashidaa laga sameeyaa.
4. Birtaa lagu daabaa, sida dubbaha, gudinta........
5. Weelkaa gadow saab looga dhigaa, sida haanta iyo qunbaha.
6. Jidhiftooda ama mayraxdooda asal baa laga sameeyaa sida sarmaanta, xagarka iyo iwm.
7. Caleenta geedahana xoolaha iyo ugaadhaa daaqa, waana lagu oodaa.
8. midhahooda iyo xabagtoodana dadkaa cuna oo ku nool, waana la karsadaa, waana la dugsadaa.

Dhulku haddaanu dhir lahayn, biyaha ma qabsado oo badda iyo webiyaasha ayey ku shubmaan. Haddaanu dhulku biyaha qabsan geedo kama soo baxeen, oo wuu nabaad guuri lahaa. Dad iyo duunyo midna kuma noolaan kareen dal abaar ah. Dhulku carro san haddaanu lahayn, dhir iyo cagaar midna kama soo baxeen. Haddaan doog jirin naf dad, duunyo iyo dugaag ma jireen.

Sida la ogyahay, laf dhabarka dhaqaalaha dalku waa xoolaha nool. Biyo iyo baad bay xooluhu u baahan yihiin, haddii kale way lee'anayaan oo anfac ma yeeshaan. Ugaandha dalku iyana waxtar weeyn bay leedahay: hilibkeedaa la cunaa saantana siyaabo badan baa loo manaafacaadsadaa. Dalxiiska ka yimaadda dhulka shisheeyaha ayaa u daawasha yimaadda. Ugaandheenu lacag bay dalka soo geelisaa.

Nafleydaas oo dhammi doogga iyo dhirta ka baxa dhulka ayey ku nool yihiin. Sidaas darteed, dhirta dadku jarayo ama gubayo, dhaawac weeyn bay u geysaneysaa dhaqaalaha dalka. Maxaa yeelay, wixii dhulka ka soo baxay ee dad iyo duunyaba ku noolaayeen baa yaraanaya ama gebigood baaba'aya.

Haddaba qof kasta waxaa la farayaa inuu sida naftiisa oo kale eu xannaaneeyo dhirta dalkiisa ku taalla. Qof geed bilaash u gooyey denbi weyn buu falay, saa naf nool buu gooyeye. Dawladda kacaanka ahi waxay kol hore dadweynaha ka codsatay in hantida dalka si wacan loo dhaqaaleeyo mood iyo noolba.

**Laylis :**

b) Sheeg saddex wax oo muhiim ah kana mid ah waxyaalaha dhirta laga sameeyo?

t ) Sidee dhirtu wax uga taraan carra guurka?

j ) Maxay ku kala duwan yihiin meesha dhirta leh iyo meesha aan lahayn?

x) Waa maxay xiriirka ka dhexeeya dhirta iyo xoolaha nool?

kh) Waa maxay xilka kaa saaran dhirta xannaanadeeda?

## Casharka XX

## DHIRTA (Gabay)

Cali Cilmi Afyare wuxuu ku dhashay meel ku aaddan Gobolka Sanaag cidhifkiisa bari. Intuu dhallinyarada ahaa wuxuu ahaa hoobal aad ciyaaraha u jecel. Magaalooyinka markuu soo galay wuxuu qayb weyn ka qaatay halgankii gobannimodoonka. Muddo dheer wuxuu gabayaa ugu shaqaynayey, welina ugu shaqeeyaa, Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha halkaasoo dadku aad ugu barteen caanna uu ku noqday gabayo murti leh oo ku baahsan wejiyada nolosha. Sababta gabaygan uu u curiyey iyo ujeeddadiisaba waxa laga garan karaa marka la akhriyo gabaygan.

**Adigoo dhalandhoolayoo dharaartu ay kululaatayoo,**
**Dhafoorkaagiyo jiidhka dhididku uu qulqulaayoo,**
**Dhalcadaad ka gashaayoo dhirtu waa nolosheenna,**
**Qabow dhuuxa laftaadiyo, dhogortaada dilaayiyo,**
**Dhaxantay kaa celisaayoo, dhanbaal aad huwanaysiyo,**
**Dhar bay kuu noqotaayo, dhirtu waa nolosheenna,**
**Marna dhuuni la quutiyo, dhuguc aad u bislaadiyo,**
**Midhay kuu dhalayaanoo, dhibtu kaaga hadhaa, oo**
**Dhirtu waa nolosheenna,**
**Dhulkoo roobku ka raagayoo, abaar laysku dhameeyeybaa,**
**Dhaameelkoodiyo xaygiyo, dhimbishii ku qabowday,**
**Daayinkay bixiyaanbaa reerku kuu dhacartaayoo,**
**Dhritu waa nolosheenna.**
**Dhafkaa hawdkiyo soolka, hadday dheertahay ooddu,**
**Dhoolla wayne libaax iyo, dhurwaagii wax cunaayiyo,**
**Dhowrtu soo mari meyso oo, waa dhis aan laga maarminoo,**
**Dhirtu waa nolosheenna.**
**Marna dhuub la xiddeeyiyo, dhigtii laysku maraayiyo,**
**Udub dhiig cas la moodiyo, dhenged aad u qurxoon iyo,**
**Xabag kuu dhadhamaysiyo, wuxuun baad ka dhurtaayoo,**
**Madhax weeye dhitaysanoo, dhirtu waa nolosheenna.**
**Daawo weeye dhabtiiyahoo, adoo dhaawac ku gaadhay baad,**
**Dheyme soo guratooyoo, irbadaa gaalku dhigaayiyo,**
**Dhakhtar kaaga wanaagsanoo, dhirtu waa nolosheenna.**
**Dhoon biyaa lagu qaatiyo, dhakal aad geela ku maashiyo,**
**Xeedho dhawr lagu sooriyo, mooyihii dhereraayee,**

**Badarka kuu dhambalaayiyo, weel dhan baad ka qortaayoo,**
**Dhirtu waa nolosheenna.**
**Haddii waayo la dhawro oo dhuxushaad u gubtaaniyo,**
**Laga dhaafo jarriinka, kolka aad dhuganeysabaa dhaayuhu kuugu**
**Farxaanoo, dhirtu waa nolosheenna.**
**Dhaxalkeenna dambectiyo dhaqaalaa waddankeenna,**
**Marna yaan lagu dheelin dhirtu waa nolosheenna.**

## Laylis :

1) Erayo iyo sharaxoodii:
Dhalandhool: socdaal.
Dhalco: qorraxda kulul (ta subaxii ama galabtii).
Dhogor: korka qofka.
Dhuuni: cunto.
Dhuub: maydhax.
Dhaayin: indho.
Dhowrta: habar dugaag.
Dhoon: haan biyood.
Dhambashaa: jejebisaa.
Qulqul: socod.
Dhambaal: dermo yar ama gogol yar.
Dhuguc: bisayl dhaaf (dhuubaan).
Xiddeeyo: la qurxiyo.
Sool: Hawd (oomane).
Madhax: dhaqaa leh (kayd).
Dhakal: hadhuub laftiisu qori tahay.

2) Tuducyadeebaa tilmaamaya waxay u tarto dhirtu, qof socdaalay oo qorraxdo gubtay? Sidee bay wax ugu tartaa? Sheeg dhawr geed oo la hadhsado?

3) Sheeg tuducyada ka hadlaya waxay dhirtu ka tarto dhaxanta? Sidee bay innooga gargartaa dhaxanta?

4) b) Sheeg dhowr geed oo mirahooda la cuno.

t) Sheeg dhirta xabagtooda la cuno iyo kuwa xabagtooda dibadda loo dhoofiyo.

j) Sheeg dhirta fooxa laga helo.

x) Sheeg dhirta waxyaabaha nolosha baadiyaha

waxtarka ku leh laga qoro? (Sida fandhaalka, mooyaha, kallaxa, duraha iwm.)

kh) Sheeg dhirta lagu dhacarto (rahanka).

5) b) Dhirtee baa codda aad ugu fiican?

t ) Dhirtee maydhaxda laga diirtaa? Maydhaxda maxaa lagu falaa?

j ) Aqalka baadiyaha alaabta lagu dhiso, sida udubka, dhigta iwm., dhirtee laga helaa?

x) Dhir badan baa Soomaalidu isku daaweysaa, kuwaa intaad ka taqaan sheeg?

kh) Dhirtu waxtarkeeda badan ka sokow, dhulka maxay ku kordhisaa?

Xay: ubax.

d) Dhirtee ubaxa qurxoon bixisa? Keese u jeceshahay? Maxaadse ku jeclaatay?

6) Dhirta cuntada aynu ka hello ee dalkeenna laga beero sheeg, mid walbana waxa laga quuto raaci.

7) Dhirta qoryahooda guryaha ama doonyaha iwm., laga sameeyo sheeg? Dalkeenna meelahee bay ka baxaan dhirtaasu?

8) b) Dhuxusha dhirtee baa laga shitaa?

t ) Dhirta haddii la gubo, ama la jaro intay nool yihiin dhibta ka timaaddaa maxay tahay?

j ) Geedna weli ma ku beertey meel dalka ka mid ah?

x) Xannaano maxay u baahan tahay dhirtu?

9) Gabayaagu wuxuu ka hadlay waxtarka badan ee dhirtu u leedahay dadka iyo dalkaba. Ma ku raacsan tahay waxtarkaa dhirtu leedahay ee uu tilmaamay? Ma ku diiddan tahay? Ma kula tahay inuu wax ka tegey, hadduuse wax ka tegey muxuu yahay?

10) Waxtarka ay dhirtu u leedahay xoolaha kuwa la dhaqdo iyo kuwo kaleba ka hadal..

## Casharka XXI

# INA XAGAADHEERE

Ina Xagaa-dheere **adhi badan buu lahaan jirey. Dharaar** dharaaraha ka mid ah, ayaa adhigii cudur ka galay. Markaasuu aad iyo aad adhiga tamootidiisii uga xumaaday. Wuxuu yidhi: «Waxaan yeeli si aan aniga iyo Ilaahay xoolo nooga dhaxayn, wuxuu iigu soo marmarsoodaba ha waayee». Dabadeedna adhigii buu laba meelood oo isleeg ka dhigay. Markaasu hadlay oo yidhi: «Eebbow adhiga qaybtaa adigaa leh, qaybtaa kalena anaa leh. Haddaba qaybtaada sidaad doonto dheh, qaybtaydase, faraha iiga qaad oo ha iigu iman». Dabadeedna waxa dhacay, in adhigii uu socday oo maalin kastaba wax ka dhintaan. Ina Xagaa-dheere, mar alla marka adhigiisa neef ka dhintaba, isna adhiga kale intuu u galo, ayuu qaar ka gowracaa oo yidhaahdaa: «Adhi laaye, adhi la laayaa buu leeyahay». Maalin dambe, ayaa roob da'ay. Markaasuu Ina Xagaa-dheere sallax biyo ku joogaan, intuu jilbaha dhigey, isyidhi ka cab. Dabadeedna sallaxii baa dibnaha kaga dhegey. Muddo dabadeed ayuu sallaxii siidaayey. Adhigii baa sidiisii hore isaga le'day. Ina Xagaadheere waxa hal heyn u noqotay, marka, **«Haddaanu hadallo waa af sallax ku dheggayagii, haddaanu aamusnana adhigaa sidaa laga deynmaayo».**

**Laylis :**

1) Adhiga qaybiskiisa maxaa ku kalifey?
2) Ina Xagaadheere diinta wax ma ka ogaa?
3) Ma ogaaday inuu qaldan yahay?
4) Wax ma ku qaatay cibaaradii la tusey?
5) Sheekada dulucdeedu waa maxay?

**Halxiraale :**

Meesha geelu maro ee uunan mar labaad mari karin!

**Maahmaaho :**

1) **Nin Ilaahay ka dambeeyo kabtiis ma yeella.**
2) **Gowso tuugeed iyo gowso macsiyeed ninba intuu galaa laga gudaa.**
3) **Nin talo xumi tabaalo ma waayo.**



Casharka XXII

## GEED IYO RUUX (Hees)

Heestani waxay ka mid tahay heesaha xulka jacaylka ugu doorroon. Abwaanku wuxuu tilmaamayaa gabadh uu sifala la cuskanayo quruxda dabeecadda iyo degaanka.
Waxay qaayaha heestu aqoon buuxda ka bixinaysaa qoto waanka caanka ah Maxamed Cumar «Huuryo» oo allifa heesaha, gabayada iyo riwaayadaha intaba. Maxamd wuxuu ka tirsan yahay abwaannada Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuniinta Dadweynaha.

**Geed iyo ruux markaynu kala garano,**
**Qorraxdogees kastaba fallaadha gantay,**
**Yaad geddeedii tahoon lagaa garan.**
**Yaad geddeedii tahoon lagaa garan.**

* * *

**Daruur goor barqa ah ku guud timi,**
**Oo intay biyo gelisay kala guratay,**
**Yaad geddeedii tahoon lagaa garan,**
**Yaad geddeedii tahoon lagaa garaan.**

* * *

**Gugoo da'ay geedahoo baxay,**
**Gelgelimo xareeda oo galacloo,**
**Garaarale baan lagaa garan,**
**Garaarale baan lagaa garan.**

* * *

**Goor fiiday godkeeda jeex la gashay,**
**Guduudka sagalkee u gaarka ah,**
**Yaad geddeedii tahoon lagaa garan,**
**Yaad geddeedii tahoon lagaa garan.**

* * *

**Dayaxoo goor caweysin soo gudey,**
**Oo geyiga nuuray gelin dhexaadkii,**
**Yaad geddeedii tahoon lagaa garan.**

**Laylis :**

1) Tuduca u horreeya, waqtiga uu abwaanku tilmaamayo marna ma u fiirsatay?

2) Sidee bay sifada abwaanku kuu dhadhantay?

3) Afarta sifo ee uu gabadha ku tilmaamay kee dooqaaga aad u cajebiyey? Waayo?

4) Tuducyadan hoos ku dhigan macnee:
   b) Goor fiiday godkeeda jeex la gashay.
   t) Gelgelimo xareeda oo galacle.

## Casharka XXIII

## **DARDAARAN** (Gabay)

Cabdi Gahayr, oo ay ooridiisii hore ka dhimatay ayaa gabadh kale guursaday; gabaygan oo waano ah wuxuu kula dardaarmayaa gabadhaa dambe; wuxuuna yidhi:

**In gar xidhata ama guudka dabi gebiga soomaali**
**Waataan gayaan dumar ku nacay lama gubaantiiye**
**Adna geela waxaan kaaga madhay gaaridaad tahaye**
**Ha yeeshee wixii kula gudboon garangartaad joogto**
**Nirgaa guriga daaqiyo ratiga geela laga reebo**
**Waa inaad adduun waa guntine maqasha gaadhaaye**
**Waa inaad martida tii golmoon gogosha siisaaye**
**Waa inaad gasiin ugu dartaa xeedhyo geeda lehe**
**Waa inaad wax lama goofiyee qaarna dhigataaye**
**Hadduu marada geygeyn ku dhaco waa gunnimo weyne**
**Waa inaan gambadu kaa xumaan golaha joogtaaye**
**Kol haddan gacmaha loo xinnayn kuma guduutaane**
**Waa inaad gadaal dhaashataa garashadeydiiye**
**Gudguduhu hadduu soo onkodo geydhu waa halise**
**Gufaacada horuu kaga ridaa guunta buulka lehe**
**Haddaan laba gufeys laysku darin gale dabayluuye**
**Gig ka siiso gibil xeeyan bay guudka mariyaane.**

**L a y l i s :**

1) Ereyadan gabayga laga soo xulay macnahooda u sheeg siday ugu jiraan gabayga: i) lama gubtaantiiye, ii) madhay, iii) gar, iv) guudka dabi, v) garangar, vi) golmoon, vii) gasiin, viii) goofiyee, ix) xinnayn, x) gudguduhu, xi) gufaacada,

xii) guunta, xiii) gufeys, xiv) gig, xv) gibil.

2) Muxuu uga jeedaa gabayaagu:

b) inta gar xidhata ama guudka dabta? (Tuduca hore) eray qudha ma ku sheegi kartaa?

t) «Waataan gayaan dumar ku nacay lama gubtaantiiye» tuduca labaad. Waa maxay waxaa uu ka nacay gayaanka dumarka?

3) Cabdi Gahayr waxyaabaha uu gabadhaa kula taliyey waxa lagu soo koobi karaa dhowr qodob. Sheeg dhowrka qodob, si koobanna uga faallood?

4) Gabayga ka soo saar tuducyada muujinaya:

b) inuu gabyaagu gabadha ka bixiyey xoolo yarada?

t) in wixii gurigeeda yaalla ay wax la hadho cid kastaaba ha timaadee?

j) in ay martida siiso cunto fiican?

x) in ay daryeesho xoolaha iyo hantida gurigeeda?

## Casharka XXIV

## WIIL-WAAL

Wiilwaal oo ahaa nin kulul oo abbaanduule ah, yaa wax ka tijaabo badnaa, markaasuu kooxdii uu madaxda u ahaa isugu yeedhay oo yidhi: «Berri haddey ahaato waxaan nin walba ka rabaa inuu ii keeno cadka rag walaaleeya ama isku dira». kooxdii oo qof waliba dhiniciisa u yaabban yahay yaa kala dareerey iyagoo ka fakaraya cadkaa. Markii ay guryihii tageen ayaa nin waliba neefkii xerada ka dhaqaaqayey gowracay, oo cadkuu shirka la tegi lahaa meel dhigay.

Odey ragga ka mid ahaa ayaa reerkiisii oo iska xoolo yarow ahaa warkii u sheegey isagoo la yaabsan cadkaa oo leh, «maantuu u darraa uu hilbana nagu raray». Gabadh yar oo markaas xiloqamad ah oo uu odeygu dhalay ayaa hadalkii maqashay, dabadeed intay odeygii u tagtay bay tidhi: «Ee anaa cadkaa garanayee, waxaad qashaan rideenna caddo wadhac», oo ahyd ri'dii adhiga u liidatay. Odeygii baa gabadhii magay oo yidhi: «Buus, naa meesha ha igu ceebayn ee ka u roon soo qabo oo cadk u fiican meel dhiga (awlalka)». Gabadhii baa tidhi: «Aabbe aniga ceebta timaadda madaxa ii saar, oo haddii lagu weydiiyana anigaa ka jawaabaya. Ridaana soo qabta». Gabadhi ri'dii bay soo qabatay, markii la qalayna waxay soo goysey cadka hunguriga la yidhaahdo, markaasay aroortii odaygii ku tidhi: «Waa kaa cadkii lagaa rabey». Odaygii baa intuu dhabannada qabsaday yidhi: «Naa maandhe meesha ha igu dilin, anigu wiilwaal waxaa la hor tegi maayee cad fiican keen, (lug, awlal ama jeeni)». Gabadhii «Aabbe wiilwaal cad uu cuno uma baahnee ujeedduu leeyahay». Yartii oo gabadh dhabeel fiican ahayd waxay ku khasabtay aabaheed cadkii hunguriga ahaa.

Markii waagii beryey ee xoolihii la sii kala daayey ayaa odeygii cadkii qaaday isagoo sii qarinaaya, oo meeshii lagu ballamay la tegey. Wiilwaal oo afka taagaya ayaa yimid oo xeedho weynoo madhan la dabo sido. Markaasuu yidhi: «Nin walowba cadkii aad sidday intaad kor u qaaddo dadka tus oo xeedhahan ku rid». Nin waliba cadkii uu siday ayuu kor u qaaday oo halkii lagu amray ku ridey, waxaanay ahaayeen hil-

bihii u fiicfiicnaa adhigii ay ku tadcaarteen. Hase yeeshee odaygii isagoo qarinaya cadkii uu siday ayuu xeedhadii ku dubuq ku siiyey oo ka soo dhaqaaqay. Wiilwaal oo nin waliba wuxuu dhigay eegayey baa arkay cadkii odaygu keenay, markaasuu u yeedhay oo ku yidhi: «Maxaad dadka u tusi weyday waxaad keentay?» Odaygii baa yidhi: «Mid yar oo bahal qaaday baa igu soo rartay waxaas oo waan muujin kari waayey». Dadkii oo yaabsan waxay ku wada hadlayaan baa wiilwaal odaygii ku yidhi: «Waar indhaha lagaa tuurye, cadka tus dadka». Odaygii oo amakaagsan oo isleh maantaad u socotay, ayaa cadkii sare u qaaday isagoo aan hadlin.

Shirweynihii ayaa jaanta rogey oo odeygii ku fooryey oo yidhi: «Alla ha u naxariisto, maantaa la dilayaa, abbaanduulihii yuuba waxaa hor keenay». Markii qayladii dantey baa wiilwaal yidhi: «Gabadhii hadda ii keen». Markii odaygii socday, ayuu wiilwaal raggii ku yidhi, dhamaantiin waxaa idin dhaanta gabadhaa odaygu dhalay, cadka rag walaaleeya ama kala dilaana waa cadkaa inanta yari u soo dhiibtay, idinna waad ku qoslaysaan, caawaanan guursanayaa, aqal ha lay dhiso mar dhow. Odaygii wuxuu gurigii tegey isagoo murugo cagaha la jiidaya, markaasuu gabadhii ku yidhi: «Naa meel laguu kaxeeye, adna isdishey anna i galaafatey, oo ninkii wiilwaal wuu ku doonayaa». Gabadhii oo aan waxba isgelin baa tidhi: «Inna wadi waxba dhici maayaane». Iyagoo wada socda oo ay odaygii cadkii ka dhaadhicinayso ayey wiilwaal u yimaaddeen.

Wiilwaal : naa maadaa cadkii soo dhiibay.

Gabadhii : haa.

Wiilwaal : oo maxaad cadka xun u soo dhiibtay?

Gabadhii : oo ma midaad cuntaad rabtay mise ujeeddaad ka lahayd? Waxaan filayaa inaad ujeeddo ka lahayd, waayo cad kale oo rag isugeeyaa ama ay isku afgartaan ma jiro.

Wiilwaal baa odaygii ku jeestay oo yidhii, gabadhanu adiga iyo intii kale ee meesha isugu timiba ka fiican. Hadda ku raaci meyso oo waan guursanayaayee ii hibee. Odaygii

oo faraxsan baa yidhi: «Waan kuu hibeeyey». Halkii baannuu habeenka laftiisii kula aqal galay. Wiilwaal oo sidaynnu hore u sheegnayba nin tijaabo badan ahaa ayaa gabadhii habeenkii uu la aqal galayba tijaabo ku bilaabay oo yidhi: «Gabadh yahay dhegeyso, waa inaad salaadda hore foolataa oo barqada dhashaa». Gabadhu intee bay gurigiisa joogtay? Gabadhii baa tidhi: «Waayahay, laakiin yaanan isku dhimannine iga war hay». Wiilwaal: «Waa hagaag».

Hiirtii (salaadii — aroortii) markay ahayd ayaa gabadhii fooli qabatay oo marba gees iska rogtay oo qaylisay. Dumarkii baa isugu soo ururay oo yaabay, markaasay naagtii ku yidhaahdeen: «Naa maxaa ku haya?» Gabadhii: «Fool baa i haysa ee i qabta». Illayn waa xaaskii wiilwaale, hadalba laguma celin, ee waa la qab qabtay oo marba gees loo rogay. Gabadhii baa tidhi: «Naa waxbaan jantaye (calmaday — rabaa) wiilwaal iigu yeedha. Dumarkii baa abbaanduulihii cid u diray oo yidhi, gabadhii wax bay jamataye dhakhso u soo gaadh ayey isku bakhtiyine, (ha moogaan maahmaahdii soomaaliyeed ee ahayd, yaan walacina ku xoolo tirin, jamadna ku caruur tirin?).

Wiilwaal oo ordaya baa yimid markaasay gabadhii tidhi: «Waxaan jantay degdeg ha la iigu keeno haddii kale fooli igama suurowdo».

Wiilwaal: «Waa la keenayaaye maxaad jamatay?».

Gabadhii, oo la wada maqalayo «waxaan j a n t a y wan xalay dhashay subag madoobihii, iyo nirig gu' dhala danbarkeed». Wiilwaal baa afka kala qaaday, yaab awgii, oo yidhi: «Naa waad waalan tahay; oo xaggay ka suuroobaysaa nirig gu' jira danbarkeed iyo wan xalay dhashay subagii.» Gabadhii baa tidhii: «Oo haddaa siday u suuroobi kartaa, caawa uurayso oo fool dhal».

Wiilwaal baa u garaabay gabadhii oo halkii ku ogaaday inay naago dhaaf ah oo ydhi: «Alleelehe midina ma suurowdo». Wiilwaal intuu dadkii meesha joogay la hadlay ayuu hadalkiisii ku soo xidhay: «Dhabeel iyo naag dhalliil leh dhab loo wada dheehan maayo.

**Laylis :**

1) Wiilwaal muxuu dadkiisa waxyaabahaas oo kale ugu dhibayey?
2) Wiilwaal sheekadan yaa ka shan iyo tobneysiiyey?
3) Micnee: «Dhabeel iyo naag dhalliile dhab loo wada dheehan maayo».
4) Sheeg dulucda sheekada?

**Halxiraale :**

Sheeg meesha neefka niriga ahi hooyadii uga weyn yahay?

**Maahmaahyo :**

1) **Hadal nin si u yidhi, ninna si u qaaday.**
2) **Ilaahow eexana ha nagaga tegin aqoonna ha nagu cadaabin.**
3) **Naagi kas ha lahaato kartina ha lahaato.**
4) **Ayaanley aqal ma weydo.**

## Casharka XXV

### HOOYO (Hees)

Heestan waxaa tiriyey Jaalle Axmed Nuur Yuusuf oo ku dhashay Baargeel sannadii 1938kii. Axmed oo bare ahi wuxuu ka mid yahay abwaannada waaweyn ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta. Heesta wuxuu abwaanku inoogu tilmaamayaa wanaagga hooyada.

**Hooyooy waxaa tahay hawlaha adduunyada midda hanata badidooda**
**hagarlada kalgacalada hibada Eebbe siiyee**
**hiddaha iyo dhaqanka midda haysa xeerkooy**
**dugsi lagu hirtaayoo dadnimada habeeya**
**hannaankeeda noloshaba midda laga hal raaco**
**ummaduhu higsanayaan.**
**Hooyooy ma liicdooy, hanuunisooy, habbooney loo wada hiloobaay.**

* * *

**Hooyooy waxaa tahay hogoshii adduunkoo nolosha hirgelisay,**
**hambalyada caruurta marka aad u heestaa,**
**hibataa naftaydoo, hooyo aan kugu farxaa.**

* * *

**Hooyooy waxaa tahay geesiga halyeyga ah midda hanaddo korisay,**
**raggana kala hormarisay, hoygeedu deeqo,**
**qaruumo u hirtaanoo hadhowna lagu tilmaamo.**

* * *

**Hooyooy waxaa tahay hablo sidii hiqaab baxay ubaxana la**
**haybad ah dhalliilna meel aan laga helin,**
**midda hooyo ku haysoo habatayoo wax**
**siisay hooyadu u noqotay.**

* * *

**Hooyo calooshaad sagaal bilood igu haysay, maxaan harraatiyo**
**feedhiyo herdi kugu gujeeyey dhalashadaydii,**
**hooyooy hafeefiyo xanuuniyo haab baad ku**
**aragtay horaaradii nuugay, qaniinyo ku**
**hafsiiyoo hooyooy kama carooninee**
**habeenkoo la seexdana waxaad la hurdi weyday**
**halka aan ka sheegtiyo hawlahayga weeye.**

* * *

**Hangaleyladeydiyo bantaan kugu habeedshay, hooyooy kama hawooto**
**hooyooy abaalkaa lama heli karaaye sidaan kugu tilmaamay**
**ha jirto ha joogto, ha jirto ha joogto hooyo.**

**Laylis :**

1) Sidee bay ku noqotay hawlaha adduunyada mid hanata badidooda?
2) Waxyaalihii ay kugu soo barbaarisay hooyadu markii aad yarayd maxaa ka mid ah?
3) Eedaadka iyo dhibta hooyo kaa soo mudatay maxaa ka mid ah?
4) Muxuu abwaanku ugu tilmaamay hooyada hanuuniso?
5) Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa «qof waliba waa hooyadii» maxaa loola jeedaa?
6) Hooyada ma u adeegsaa oo u ma u dhega nugushay?
7) Waa maxay waajibka kaa saaran waalidkaa?
8) Ma taqaan heesaha hooyadu ku kolkoliso caruurta?
9) Ka sheekee sidii ay hooyo kuu xannaanaysay markaad yarayd?

Casharka XXVI

## ARRAWEELO (Sheeko)

Arraweelo waxay ahayd boqorad ragga aad u neceb, oo wayba dhufaani jirtey. Dumarka waxay kula talin jirtey in ay waxay doonayaan diidaan, waxay diidayaanna doonaan, aadna dhibta ragga bay u jecleysan jirtey.

Arraweelo waxay leedahay sheekooyin badan oo goos-goos ah. Maalin baa la yidhi waxay amar ku bixisay odayaasha oo dhan in la laayo oo carrada laga dhammeeyo. Odey la odhan jirey odey-biiqay baa dhallintii weydiistey inaan la dilin. Wuxuu ku yidhi: «Waar i daaya ha i dilina e maalin baan wax idiin tariye, dhallintii way nabad geliyeen oo meel bay ku qarsadeen».

Odayaal in la dhameeyey baa Arraweelo loo geeyey. Degdeg bay u shirisay raggii dhallinyarada ahaa waxay ku amartay in loo keeno saddex waxyaalood oo kala ah dhig cirka gaadha, saan dhogor labada dhinacba ku leh iyo awr raran oon heeryo iyo xadhkatoona lahayn.

Talo way ku caddaatey oo si ay yeelaan bay garan waayeen. Odey-biiqay in loo tago baa arrini ku soo ururtay. Waa u bandhigeen waxay Arraweelo ku kaliftey. Odey-biiqay wuxuu dhallintii u sheegay, «waxaan idiin lahaa i daaya waxaas oo kale in aad la kulmeysaan baan hubay; awr dhoobo ha ku galgalimaysto oo isaga oo qoyan midho ku dhedhejiya saanta laba dhinac dhogorta ku leh waa dheg-dameer, dhigtana wax lagu qiyaaso keen dhaha. Sidii beyna yeeleen, oo Arraweelo loo geeyey. Iyada oo aad u xanaaqsan bay tidhi: «Waar yaa yidhi odayaal la dhamee, carrada way joogaane ha la ii keeno kii ka arrimiyey taladaas». Raggii yaryaraase way ku fara adaygeen odey-biiqay si ay talo uga helaan. «Haddaan taladu kama maarantee odeyo loo miidhin, ninkii kelidii maalootiyaa meel xun waw halisee».



**Laylis :**

1) Heesta maxaa Arraweelo iyo ibliis laysu raacshey?
2) Maxay u damacdey in odayaasha la laayo?
3) Odayaashii yaa ka hadhay?
4) Dulucda sheekadu waa maxay?

**Maahmaahyo :**

1) **Nin aan waxa soo socda garanin waxa jooga ma garto.**
2) **Rag la'aani wax kuma yeesho ee ra'yi xumaan baa wax ku yeesha.**
3) **Rag lama maleeyo ee waa laga maleystaa.**
4) **Nin gu' kaa weyni il-guraxeed kaa weyn.**

**Halxiraale :**

Dadka ilkihiisu da'day ku soo wada baxaan?

## Casharka XXVII

## MIDAB GUMEYSI DIIDA (Hees)

Heestan la yidhaahdo «Midab gumeysi diida» waxay si aqoon iyo waxgarad ah innoo tusaysaa dhibaatooyinka iyo foolxumada uu kula kaco gumeystuhu dalal ka mid ah Qaaradda Afrika. Wuxuu abwaanku uga digayaa dalalka xornimada jecel xeeladaha cusub ee doqoni ma garatayga ah ee uu mar labaad rabo inuu gumeystuhu ku dago Afrika. Heesta waxaa curiyey abwaanka Maxamuud Cabdillahi (Sangub) oo ku dhashay Dhagaxbuur sannadkii 1947kii. Maxamuud wuxuu ka mid yahay abwaannada waaweyn ee Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha.

**Yaan Ismiidh ma muuqdeen, Roodiishiya ma maageen,**
**haddaan midig la siinin**
**Boortuqiis ma madhiyeen, mana uu maleysteen,**
**Musanbiiq, Angoola**
**Mindiyihii qarsoonaa, qarsoonaa, Gini lagu miraayey,**
**Sowt Afrika ma moogin**
**Hadal iyo murtina waa, Afrikaay ismaqaloo**
**Midab gumeysi diida, diida, diida.**

* * *

**Dadka oo midooboo, dunidii masowdiyo,**
**Nabad lagama maarmo,**
**Maalintay xumaatee, ragga aydin murantaan waranku,**
**Waa macaan yahay**
**Madowgaaga kaa rabin, ninkaan rabin, muuqaaga kii**
**Neceb, kiisana ha meel marin**
**Hadal iyo murtina waa Afrikaay ismaqaloo**
**Midab gumeysi diida, diida, diida.**

* * *

**Haddii aan maskaxi talin, dhegtu maqal xumaha jira,**
**Indhuu maalin aragtida,**
**Luguu hawsha maamulin, gacmuhu wax kuu qaban,**
**Midabkuba sad weeyee, sad weeyee,, magacuba**
**Dan weeyee, murtidu dhaxalgal weeyee**
**Hadal iyo murtina waa Afrikaay ismaqaloo**
**Midab gumeysi diida, diida, diida.**

**Madaxdii Afrikaay mabda'ii gumeysigu magacood be'**
**Wuxuu yahay wanka macasha ii qabo,**
**Adigu gowrac ii mari, dhiiggana aan muudsado**
**Jidkii aad ku madhateen, ku madhateen,**
**Maya haddaad tidhaahdaan, ma afkaa maroorsami**
**Hadal iyo murtina waa, Afrikaay ismaqaloo**
**Midab gumeysi diida, diida, diida.**

**Layli :**

1) Muxuu abwaanku u magacaabay Yaan Ismiidh?
2) Maxaa ka dhexeeya ee isu keeney Boortuqiiska, Musaambiiq iyo Angoola?
3) Miyaa la gumeystaa muxuu abwaanku u carabaabay Koonfur Afrika?
4) Waa maxay midab gumeysiga uu sheegey abwaanku? Yaa sameeya?
5) Muxuu kaa mudan yahay qofkii yasa midabkaaga?
6) Maxay tahay tuducdani:

   «Wanka macasha ii qabo, adigu gowrac ii mari dhiigana an muudsado».
7) Muxuu abwaanku ugu baaqayaa Afrika?
8) Dalalka abwaanku u baaqayaa dhaqdhaqaaqyadooddii iyo halgankoodii ma ku guuleysteen?
9) Sheeg xiriirka ka dhexeeya heesta iyo maahmaahda Soomaaliyeed ee ah «Nin waliba sida uu kuugu liso ayaa loogu hambeeyaa».

Casharka XXVIII

## GEELA (Hees)

Heestanu waxay ka waramaysaa kartida, adkaysanka iyo manaafacaadka geelu ieeyahay. Abwaanku wuxuu tilmaamayaa sida geela loogu aayo marka abaari dhacdo oo baad iyo biyoba gabaabsi noqdaan. Wuxuu abwaanku sheegayaa inuu geelu ku geli karo hanti, deeq iyo gaadiid intaba.

Heesta waxaa curiyey abwaanka caanka ah Cabdalla Maxamed (Cabdalla Sagsaag) oo heesaha allifa kuna luuqeeya.

**Geelaa markuu dararan yahay laba nin duugtaaye**
**Geelaa markuu dararan yahay laba nin duugtaaye**
**Markay dirirro hooraan geeduhu da' joogaan**
**Dala wada irmaan baan kugu diidin nirigoto godol debecsanaatee**
**Gobno kuma daryeesho, marti kuuma deeqdoo, doobi lagama buuxshe**
**Geelaa markuu dararan yahay laba nin duugtaaye**
**Geelaa markuu dararan yahay laba nin duugtaaye**

* * *

**Dunidoo ah jiilaal marka ay dameeruhu**
**Ilmahooda diidaan, isagaa wax daaqaba ugu nolol dambeeyee**
**Diihaalka gaajada isagaw dulqaatoo abaar kaaga doogee**
**Geelaa markuu dararan yahay laba nin duugtaaye**
**Geelaa markuu dararan yahay laba nin duugtaaye**

* * *

**Haddii gacal isdaysto waa ul iyo diirkeed**
**Waxse maalin kala dira, taageero iyo cawl waa dayr cadkiise**
**Baahi qabe iyo geerida waxa lagu daweeyaa dambarkiisa weeyee**
**Geelaa markuu dararan yahay laba nin duugtaaye**
**Geelaa markuu dararan yahay laba nin duugtaaye**

* * *

**Marka doog dhammaadee dabeylaha xagaaggiyo**
**Lo'du dooxa jiiftee dadku wada harraadee dirgan waayo**
**Socodkee, dalandool dal kaa dheer isagaa degdeg u taga**
**Geelaa markuu dararan yahay laba nin duugtaaye**
**Geelaa markuu dararan yahay laba nin duugtaaye**

**Laylis :**

1) Muxuu abwaanku uga danleeyahay «Geelaa markuu dararan yahay laba nin duugtaaye?»

2) Ka soo dhexsaar heesta tuduc tilmaamaya adkaysanka geelu u leeyahay harraadka?

3) «Dalandool dal kaa dheer isagaa degdeg u taga» sharax tuducan?

4) Maxaad ka qabtaa tuduca ah «Isagaa wax daaqaba ugu nolol dambeeya?»

5) Ma ku raacsan tahay abwaanku sida uu u ammaanay geela? Waayo? Faahfaahi ra'yigaaga?

## Casharka XXIX

## DHEGDHEER (Sheeko)

Dhegdheer waxay ahayd dadqalato aad looga baqi jirey, oo ku noolaan jirtey boholaha Xargaga la yidhaahdo oo Laas-caanood u dhow, meeshaa waa laga qaxay, iyada oy sabab u ahayd abaar ku sinnayd intii ay meesha hoyga ka samaysatay iyo cabsi ka dhalatay.

Dheg aad u dheer oo ay lahayd darteed bay magaca kula baxday, wax aad u dhega waddan bayna ahayd, laba haamood, mid hilibka ay ku ridato iyo mid biyood bay lahayd. Bawda haanta hilbood meel ay joogtaba way maqli jirtey, sardho had-dey ku jirtana. Dhegta dheer oo hoos u dhacda baa lagu ga-ran jirey in ay huruddo.

Dhegdheer oo sida dabaylaha u duusha baa maalin naag ilmo xambaarsan ooy eryanaysay ka gudubtay boholaha Xar-gagan oo ahaa waxa qudh ah ay wadnaha u xidhay. Calaacal iyo baroor bay boholaha qaarkoodii isla taagtay:

Hoh iyo boholaha Xargagan
Nin xiimaayey xidhaan
Nin duulaayey dabraan
Bal naagtaa badhida daya
Bal bowdyo caddaanta daya
Hoh iyo boholaha Xargagan.

Gabadh ay dhashay baa aad u necbayd waxa ay ku ka-caysay, in badanna ka tuugtay in ay mar uun u badbaadiso qof yar oy weheshato, dhegse uma dhigi jirin.

Laba gabdhood oo ambada baa ina dhegdheer oo keli-geed gurigii joogta u yimid — «Amarkii Ilaahiyo waqtigu waa wax kaa adage, nin ambaday halkuu aadey waa ula ekooneyde».

Inantii oo ka calool go'day in ay la noolaato hooyadeed baa ka tuugtay hablihii in ay la joogaan ama kaxeeyaanba. Waxay ugu jawaabeen iyaga oo ogaaday khatarta meeshu ku

sugantahay, «Haddaan kula joogno hooyadaa baa na qalan, haddaad na raacdidna way na soo raadin, dhaxdeynagu soo gaadhi oo ka daran». «Haddaba ila dila hooyaday» inanti baa tidhi. «Sidee baannu u dilnaa» hablihii baa weydiiyey iyagoo cabsidii ku sii weynaatey. «Hadda waan idin qarinayaa, caawa markay seexato ee ay dhegta dheeri hoos u dhacdo baynu madanayaal dab leh ku gubi doonaa. Weyna kaga dhabeeyeen, oo halkaas bay ku dhimatay dhegdheer, dhibteediina lagaga raystay Eebbana raxmad dhulkii mariyey oy farxad heleen:

Dhegdheer dhimaatoo dhulkii nabad
Xargaga roob baa ka da'ay
dadow soo doogsin raac

**Laylis :**

1) Buti, orgobe, dadqal/dadqalato, madaxkuti, qoryoismaris, caws iyo biyo ku nool, iyo xadhigluhu wax jira ma yihiin?

2) «Dhegdheer» magacu ma astaan buu u ahaa mise dhege waddanaan?

3) Boholaha Xargaga waa Gobolkee?

4) Dulucda sheekadu waa maxay?

**Maahmaaho :**

1) **Haddaad xoog weydid xiilo ma weydid.**
2) **Nimaad dhashay kuma dhalin.**
3) **Nin kula yaal baa tabtaa yaqaan.**
4) **Ilko wadajir bay wax ku gooyaan.**
5) **Arrin adaa ku nool ee iyadu kuguma noola.**

**Halxiraale :**

Fardo guul ma hor baa loo wadaa mise dib?

## Casharka XXX

## GUULWADE (Hees)

Heestan waxa curiyey Ciise Maxamuud Faarax oo ku dhashay magaalada Laas-qoray sannadkii 1947kii. Abwaanku wuxuu heesta inoogu macnaynayaa waxa uu guulwaduhu dadka iyo dalka u galo. Waxay heestu inoo caddaynaysaa inuu guulwaduhu yahay ama lagu tilmaami karo qof allaale iyo qofkii xooggiisa iyo hantidiisa si hagar li'i ah ugu hura, xil gaar ahna iska saara danaha kacaankiisa iyo ummaddiisa. Wuxu kale ee is-hortaagaa sokeeye iyo shisheeye wixii dalka iyo dadka kula kaca hagardaamo.

SU'AAL DADWEYNE:

**Adigoo garmaamo gabbal dhaciyo waa goonyaha magaalada**
**Hadba gaaf wareega, gaaddada ku gaartay il-guduudan**
**Guulwadow sheeg? Maxaad gashaa, guulwadow sheeg?**
**Aragnee. Hadda sheeg, bal noo sheeg, maxaad guddaa,**

JAWAAB GUULWADE:

**Kii gaabinaayee, u gargaara cadowgee,**
**Gacan siiya nacabkee, guulaha kacaankiyo,**
**Garab mara wanaagaan, godka biyo u gelinnaa,**
**Goondaha gammuuniyo, rasaas aan ku goynaa.**

GARWAAQSI:

**Garasho waa kaskii wacan galladi waa agjoogee,**
**Gudbiyoo hawsha wad, kula garannee hawsha wad,**
**Guulwadow hawsha wad!**

SU'AAL DADWEYNE:

**Adigoo garmaamo gabbal dhaciyo waa goonyaha magaalada**
**Hadba gaaf wareega, gaaddada ku gaartey il-guduudan,**
**Aragnee, hadda sheeg, bal noo sheeg, maxaad guddaa,**
**Guulwadow sheeg? Maxaad gashaa, Guulwadow sheeg?**

JAWAAB GUULWADE:

**Kii gowracaayee u guntada gaadmo**
**Gaasiraaya gobannimo, garsoorka dalkiisa**
**Caasiyee gardiidaan godka biyo u gelinnaa**
**Gondaha gammuuniyo rasaas aan ku goynaa.**

GARWAAQSI:

**Garasho waa kaskii wacan galladi waa garab agjoogee**
**Gudbiyoo hawsha wad, kula garanee hawsha wad,**
**Guulwadow hawsha wad.**

**Laylis :**

1) Muxuu abwaanku u su'aalayaa Guulwadaha sababta uu u wareego?
2) Wuxuu abwaanku sheegay inay il-guduudan gaaddada ku gartaan, maxay ishaasi astaan u tahay?
3) Waa kuwee kuwa gaabinaaya ee ay guulwadaha col yihiin?
4) Guulwaduhu ma kan labiska xiran uun baa?
5) Marka dharka laga tago, maxaa u astaan ah oo lagu gartaa Guulwadaha?
6) Maxay kala yihiin cadowga iyo nacabka uu abwaanku tilmaamayaa?
7) Muxuu abwaanku uga jeedaa tuduyadan:
   b) «godka biyo u gelinaa».
   t ) «garasho waa kaskii wacan, galladi waa garab agjoogee».
8) Sheeg xiriirka ka dhaxeeya Ciidanka Boliiska iyo Guulwadayaasha?
9) Saddex wax ka tilmaam faa'iidooyinka badan ee Guulwaduhu dalka ku soo kordiyey?
10) Weli ma booqatay golaha hanuuninta ee xaafaddaada oo ma deristey hawsha Guulwadaha? Maxaad ku aragtey?

## Casharka XXXI

## CAAFIMAAD (Gabay)

Cabdillaahi Macallin Axmed oo ku magacdheer «Dhoodaan», wuxuu 1936kii, ku dhashay meesha la yidhaahdo Wardheer; isla meeshaana wuu ku barbaaray. Intii ka horraysay 1963kii, Cabdillaahi wuxuu ahaan jirey xoolo dhaqato, gaar ahaan geel jire. Laakiin sannadkaa laftiisa ayuu ka mid noqday Ciidamada Xoogga Dalka, shan sano ka dibna, wuxuu ku wareegey hoobollada Xoogga Dalka oo uu illaa hadda ka mid yahay. Hooballada intuu ku jireyna wuxuu qayb libaax ka qaatay marinta iyo curinta heesaha, gabayada iyo maadeysyada.

Haddaba Cabdillaahi ummadda soomaaliyeed wuxuu kula talinayaa dhirta dalkeenna inay aad u bartaan oo wixii daawooyin ka noqon kara cudurrada aynu dagaalka kula jiro laga faa'iidaysto.

Daawooyinka halkan (gabayga) uu ku soo qaaday, Cabdillaahi ma hubo inay daawooyin dhab ah yihiin. Markaa talo waxa naga ah, inaad hubsatid oo adigu runta kama dambeysta ah aad gaadhid; waxaad ogaataana gabayganu inuu murti iyo majaajilloba isugu jiro. Wuxuu yidhi:

**Waxyaabahaan dharaar nool idhaa taaba maan dhuganno**
**Dhakhtarnimo ka soo qaad balwaan kuu dhildhilayaaye**
**Caanaha dharkaynkiyo haddaan dhirindhir soo hoorsho**
**Oo aan dhammaajiyo ku daro xabagta dhiigsaarka**
**Oon dhiil xarreediyo intaa dheri ka soo buuxsho**
**Oon daboolkow dhuujiyoo dab u dhardhaarreeyo**
**Kolay boogta dhaymo u noqdaan lama dhalliileene**
**Ma dad dhoohan baannahay maxaan taa u dhugan weynay**
**Haddaanse laamo dhaadheer ka qodo dhuundhas xididkeeda**
**Oon xadhig dhan kaga soo xidhoon dhinac u laalaadsho**
**Oon weel u hoos dhigo biyaha way dhibdhibicdaaye**
**Inuu dhibiq tifleeyaba qoryaha wixii ka soo dhiiqay**
**Haddaan weliba dheecaan mawiyo dhamastanow geeyo**
**Oon dhaal ku wada shiilo oon dhalo ka soo buuxsho**
**Inay dhabarka daawo u noqdaan way u dhowdahaye**
**Ma dad dhoohan baan nahay maxaan taa u dhugan weynay.**

Erayo la sharxay micnahocda:

**Dhildhilayaa:** Macne cad ka bixinaya.

**Hoorsho:** Liso.

**Dhaymo:** Dawo (daawo).

**Dhalliileen:** Yaseen.

**Dhugan weyney:** Eegi weyney.

**Laalaadsho:** Meel sare soo suro.

**Dhiddhibicda:** Da'da.

* * *

**Dhiiqdaa:** Wax socdaa ya yimaadda.

**Dhamac:** Dab.

**Dhuudhi-roorid:** Isku soo kogid.

**Burruqda:** Badhida dhirta.

**Dhiidhiitii:** D.D.T. su ndullinka lagula dagaallamo.

**Dhiqle:** Dulinka dadka guryaha ku cuna sida kutaanka, takfida iwm.

**Weydiimo:**

1) Ujeeddada guud ee gabaygani waa maxay?

2) b) Dhirta gabayga lagu sheegay maxaad ka taqaannaa? Qor sharraxoodana raaci.
   t) Ma hubtaa dhirtaa in laga helo dawo iyo in kale? Ka hadal.

3) Maxaad oggoshahay, maxaadse diidan tahay fikradda gabaygan?

4) Dadka aad la nooshahay intaad dhexgasho, waxaad soo qortaa dhir laysku daweeyo iyo cudurrada layskaga daweeyo!

5) b) Dadka dhirta laysku daweeyo kala yaqaan, waxna ku daweeya maxaa lagu yaqaan?
   t) Maxaa sidaa inay u dhaqmaan ugu wacan?

Casharka XXXII

## **AFKA HOOYO** (Hees)

Heestan waxa curiyey Maxamed Ibrahim Warsame (Hadraawi). Maxamed wuxuu ku dhashay miyiga Gobolka Togdheer sannadkii 1943kii. Abwaanku wuxuu heestan inoogu caddaynayaa baahida loo qabay afka hooyo.

**Dhalashada afkaygiyo, dhigashada fartaydaan**
**Kaga baxay dhibaatoon, howlihi ku dhaafee**
**Iyadaa dhaqaalaha, dhidibada u aastoo dheelliga u diidee**
**Dhulka wada jirkiisii iyadaa dhammaysee**

**Waa inaan ku dhaatau afkayga**
**Waa inaan ku dhistaa afkayga**
**Waa inaan ku dhaqdaa afkayga**
**Waa inaan ku dhergaa afkayga**
**Waa inaan ku dhintaa afkayga.**

**Shalay dhabannahayskii, dhoollo ka qosol maanta ah**
**Xaley bow dhaxaysee, dadka dhooban meeshee**
**Isku soo dhawaadee, dhanka qudha u jeedow**
**Ma hesheen dhanbaalkii.**
**Hadalkii ma dhuuxdeen, ma idiin dhadhamayaa**

**Waa inaan ku dhaataa afkayga**
**Waa inaan ku dhistaa afkayga**
**Waa inaan ku dhaqdaa afkayga**
**Waa inaan ku dhergaa afkayga**
**Waa inaan ku dhintaa afkayga.**

**Qofka dhoohanow arag ka dhcga la'ow maqal**
**Haddaan dheri dab lagu shidin, dhuuniga ma kariyoo**
**Waxba lagama dheefee, dheehdoo danteennii**
**Halka dhaawac kaga yaal**
**Lafta dhabarka weeyee, boogaha ma dhaynaa?**

**Waa inaan ku dhaataa afkayga**
**Waa inaan ku dhistaa afkayga**
**Waa inaan ku dhaqdaa afkayga**
**Waa inaan ku dhergaa afkayga**
**Waa inaan ku dhintaa afkayga.**

**Laylis :**

1) Maxaa ka mid ah dhibaatooyinka dhigaalka farta lagaga baxay?
2) Siday fartu u keentay wadajir?
3) Muxuu abwaanku ulajeedaa:
   - b) «Shalay dhabannahayskii»;
   - t ) «Ma hesheen dhanbaalkii»;
   - j ) «Waa inaan ku dhaataa afkayga»;
   - x) «Haddaan dheri dab lagu shidin».
4) Maxay tilmaamaysaa «Lafta dhabarka weeyee?»

## Casharka XXXIII

## DHALLINYARADA (Gabay)

Gabaygan soo socda waxa curiyey, gabayaaga weyn ee caanka ah, Xaaji Aadan Afqallooc. Wuxuu ka hadlayaa waqtigu xilka weyn ee uu garbaha u saaray dhallinyarada soomaaliyeed iyadoo odayaashii dalka xilkaa u hayn jirey gabow iyo waqtiga isbeddelkiisa arrimaha ka dhashay awgood aan maanta iyaga waxtar magac leh laga filayn. Gaar ahaan wuxuu ku guubaabinayaa dhismaha dhaqaalaha, waxbarashada, shaqada, wadajirka, iskaashiga, siyaasadda iyo u dadaalka iyo u feejignaanta horumarka ummadda soomaaliyeed ay ku talajirto una hanqal taagayso.

**Hadduu geed engego xaabadaa, lagu idlaystaaye**
**Mid yar oo iniintiisa ah baa, soo awaal baxa e**
**Usagaa anfaaciga hadhkiyo, oodda kaafiya e**
**Dadkana odeygu goortuu ka baxo, iyo islaantiisu**
**Ubadkooda hadha baa tabcoo, aayatiin hela e**
**Aadan iyo Xaawa iyo markii, kaynta la abuuray**
**Sidaasay arwaaxda iyo dhirtuba, ku isirraayeene**
**Ummaddaan shabaabkeedu hanan, waw ayaan xumi e**
**Innamo iyo hablaba waxa tihiin, aarankii kacaye**
**Itaal gabe dadkiinii hore, oo waydiin aragtaane**
**Adinkaa ammaanada xilkii, eeggan qaabbiliye**
**Iskaa-wax-u-qabsadu nolosha, waw udub dhexaadkiiye**
**Isriifka iyo fadhigu, waa waxaad ku ambanaysaane**
**Axmaqnimo waqtiga kaaga tegey, oohin kugu reebye**
**Ayaantii ku dhaaftaana waa waxaan la eegeyne**
**Arsaaq yaridu waa caajiskaan la oggolayn hawle**
**Ma amdaro cirkuye lacagta, waa lagu adeegaaye**
**Axadkii kaslaan ihina, sabool abidkyo weeyaane**

**Rabbi nimuu laxaadka u ebyey, oo camal awood waayey**
**Oo aan shaqo naftiisu oggolayn, waa abaal dhacaye**
**Istiqlaalka waxa taam ka dhiga, waa adduunyada e**
**Mar haddii dhaqaaluhu akhiro, calanku ïimowye**
**Kolkaasuu amaahiyo baryaba, aradku doonaaye**
**Icaanaduna xornimaday u tahay, eebadii melege**
**Albaabkuu gumaystuhu ku xado, umamka weeyaane**
**Wixii uu ajnabi kuu qabtanna, aayatiin ma lahe**
**Isku tiirsi baydiin eg iyo ururin xoolaade**
**Ictisama islaamkaa la yidhi gebi ahaantooda**
**Aayadaha diinta iyo sharcigu waynagu amreene**
**Axaadiista nebigay ku timi saa ku aragteene**
**Ikhtilaafku waa naar jannana waa isu imaade**
**Raganimo nimaan tacab ku arag aayar heli waaye**
**Ijtihaad gobanimo dhibbaa lagu ilaashaaye.**

**Laylis :**

1) Gabaygan yaa curiyey?

2) Tuducyada 1da, 2da iyo 3da dhirta yar-yari kaalintay kuwa gaboobay ka baxeen sidee bay waxtarkii ay lahaayeen uga soo baxaan?

3) Sheeg tuducyada muujinaya in sida dhirtuba kaalinta kuwa engegaa ka' baxaan kuwa kale u buuxiyaan halkaana ka sii wadaan dheeftii iyo waxtarkii laga heli jirey, dadkuna kala mid yihiin.

4) Oor tuducyada gabyaagu dhallinyarada kagala hadlayo xilka la gudboon dabadeed duqaydii markay taagdaraysay?

5) Tuducee baa muujinaya guuldarrada iyo urugada uu leeyahay waqtiga lagu lumiyo warwareega, joog-joog xumada iyo macne-darrada?

6) Dan la'aan oo meel laysaga fadhiisto iyo israafka cidhibtoodu waa maxay sida gabaygu leeyahay?

7) Kaslaanimadu ayaandarraday soo hoyso ka hadal?

8) Tuducyadee baa muujinaaya saboolnimada iyo foqorka waxa keena?

9) Xumaantay leedahay foqorku wax ka sheeg?

## Casharka XXXIV

## ISHTIRAAKIYADDA (Gabay)

Gabaygan soo socda' waxa curiyey gabayaaga weyn ee caanka ah, Xaaji Aadan Afqallooc. Waxaanuu ku muujinayaa Ishtiraakiyaddu inay ahaan jirtay hiddaha iyo dhaqanka' Soomaaliyeed iyo weliba sida toosan ee mabda'aas loogu habeeyo nolosha iyo dhismaha ummadda'. Sida ka muuqata gabaygana wuxuu Xaajigu u curiyey inuu dadka u muujiyo una tilmaamo hantiwadaaggu inaanu wax qalaad oo dibedda lagaga' keenay ummadda Soomaaliyeed ahayn.

**Ishtiraakiyaddu waa mabda'a lagu islaaxaaye**
**Asalkiisu waa kaalmadaad ab u lahaydeene**
**Waa wadajirkay odayadii hore asaaseene**
**Akhlaaq xumada boobka iyo dhacuu kala ilaashaaye**
**Axad kelidii nolol doonaya baanu ogolaanayne**
**Insaan mulki leh iyo sabool, shilin la' weeyaane**
**Midna ma afdalo ee, sharcigu waa wada ekeeyaaye**
**Istimaarka iyo gaajada, iyo aafadii cudurka**
**Iyo wuxuu dagaal ku aclinaa, waa aqoon li'iye**
**Isku tiirsi buu doonayaa, camal la ogaaye**
**Afka hadalka oo lagu beddelo gacan adeegeysa**
**Ummaddoo wada shaqaysiyo, dhulkoo oonta lagu beero**
**Arsaaq badatey aradkoo nicmada, idil la gaadhsiiyo**
**Oommne halkii ah oo biyaha riigga lagu eego**
**Dhulkoo laga umuliyoo wixii aasan laga baadho**
**Dhaqaalaha adkaadaan cid kale laga amaah doonan**
**Eexda iyo rishwada oo go'oo xaqu iftiin yeesho**
**Alla qabayda beenta ah oo ciqaab lagaga aargoosto**
**Edebta iy o dhaqankii horaan waana la illaabin**

**Intamaqan dalkii oo xoriyad lala itaal doono**
**Axadkii qudh gooya oo qisaas lagu abaal siiyo**
**Insaafnimo ninkii mool hayaa caadil ku ahaado**
**Ixtiraamka diintiyo tacliin aayo lagu gaadho**
**Amniga oo xasil a jeyshka oo aalad iyo xoog leh**
**Feeyigo maamulkii ogyhay aradka xaalkiisa**
**Ahdaaftiisa badan baan intaa ka adkurayaaye**
**Adduunkaaga adigaa iska leh ayniguu yahaye**
**Ninna lama afduubo ee qasdigu waa isu imaade**
**Mar hadday intaasuba dhacdayoo tawraddu adkaysay**
**Ayidaaddu waa waajibiyo inaan adeecnaaye**
**Nin dantiisa qudha eegayow adigu yaaIkaaye**
**Ayaxa guurey weligiis alluu koronkor aasaaye**
**Malahay ameerikaanigii baad axad lahaydeene**
**Afka lagama dhowro oo xaqa waa la ictiraafaaye**
**Sida haatan amarku u socdo ee aynu ku arkaynuo**
**Isbeddel arrimihii hore iyo urugadoodiiye**
**Haddii aan maragga lagu eexanayn waa islaanimo e**
**Saw tii aad ogeydeen wixii uunku qabay maaha!**

**L a y l i s :**

1) Ereyadan gabayga laga soo guuriyey oo asalkoodii hore af-Carbeed yahay macnahooda af-Soomaaliga ah sug adoo hadba la kaashanaaya tuduca ay ku jiraan:

Ishtiraakiyadda (1), mabda'a (1), islaaxaaye (1), asaaseene (3), akhlaaq (4), axad (5), afdalo (7), aclinaa (8), arsaaq (13), qisaas (21), rishwada (17).

2) Adigoo la kaashanaaya toddobada tuduc ee gabayga ugu horreysa sheeg wuxuu gabayaagu ku tilmaamey ishtiraakiyadda.

3) Macnee tuducyadan laga soo qaatay gabayga:
   b) Asalkiisu waa kaalmahaad ah u lahaydeene (2);
   t) Afka hadalka oo lagu beddelo gacan adeegeysa (11);
   j) Dhulkoo laga ummuliyoo wixii aasan laga baadho (15);
   x) Eexada iyo rishwada oo go'oo xaqu iftiin yeesho (17);
   kh) Axadkii qudh gooyoo qisaas lagu abaal siiyo (21).

4) b) Ayaa tiriyey gabayga?
   t) Waa maxay ishtiraakiyaddu?
   j) Sheeg erey af-Soomaali ah oo uu dhigma ishtiraakiyadda?
   x) Sug tuduca gabayaagu uu ku tilmaamey inay Ishtiraakiyaddu tahay wax weligeedba aynnu hiddo u lahayn?
   kh) Ma ku waafaqsan tahay sidaa gabayaaga? Sheeg sababta aad ugu waafaqsan tahay ama diidan tahay sidaas?